# U SAHAMI ADOON RARIN

Diiwaanka Suugaanta Dr. Cali Sh. Axmad Abuubakar

**Dr. Cali Sheekh Axmed Abuubakar**

DAL IYO DIBAD

Hiil Press, waa shirkad daabacaad, faafin iyo  baahin.
Hiil Press, wax ay u heellantahay hodminta maktabadda Soomaaliyeed iyo in ay abuurto kacdoon aqooneed oo horseeda horumar iyo horusocod bulsheed.

© Dr. Cali Sheekh Axmed Abuubakar 2021
Xuquuqda buuggan idilkeed waxaa leh qoraaga ku magacaaban. Dib loo ma daabacan karo, si kalena loogu ma tagrifali karo, iyada oo aan qoraaga laga helin oggolaansho qoran.

Madbcadda Hiil Press

contact@hiilpress.com
Daabacaadda 1aad (2021)

U SAHAMI ADOON RARIN

Quraaridda buugga: Cabdilladiif  Geelle
Tifaftirka buugga: Aw-Guudcadde
Nashqadda jaldiga: Hiil Press

ISBN:   978-1-63760-451-9

# Tusmo


**HIBAYN.................................................................7**
**HORDHAC...............................................................8**
**MAHADNAQ...........................................................10**
**GOGOLDHIG...........................................................11**

1. SIDEED MADAX KU NOQON KARI?..........13
2. RAAD WANAAGSAN SII REEB.....................15
3. DADKA YAA WAX WADA BARA!................17
4. U SAHAMI ADOON RARIN...........................19
5. WAQTIGIISA DHUMIYE...............................25
6. DHIMASHADA HA YEELINA!......................28
7. DADKU MAXAY CODSANAYAAN?.............30
8. QALLOOCEENNA YAA DHALAY?...............37
9. QURBAJOOG DHAMMAANTIIN..................40
10. KHUDBASIRO MA GUUR BAA?.................46
11. Hanka weyn...................................................53
12. Rejalaawe ha la degin....................................55
13. Yaa qaydka igu xiri?......................................56
14. Tallaaba Kowaad............................................59
15. Jacayl baa wanaag dhala.................................61
16. Fanku wax buu cabbirayaa.............................64
17. Yaad kaashanaysaa?........................................68
18. Magiciisu waa kee?.........................................70
19. Faruxu saasuu ku iman....................................72
20. Dumar baa barwaaqa ah..................................73
21. Haddii aan wax qaban karo.............................76
22. Qaskii loo durbaan tumay................................78

23. Yuu furuhu kaa lumin!........................................83
24. Dambidhaaf.......................................................86
25. Cidi ma kuu sheegtay?......................................87
26. Hantaaq.............................................................89
27. Ila dumi walaalow!............................................90
28. Deeqsii mucaamalo............................................91
29. Maxay hooyo mudan tahay?..............................92
30. Dadnimoy maxaa tahay?....................................93
31. Wax baro............................................................95
32. Ha danaysan kelidaa..........................................96
33. Aqoon baa hoggaan u ah...................................97
34. Sirta guurka........................................................99
35. Waxaad qaban u soojeed..................................103
36. Dariiqa Dacwada..............................................105
37. Dhalan-rog........................................................106
38. Maxaa been ka daba timid!..............................108
39. Dariskaagu waa nolol.......................................109
40. Dhaar iyo dhibteed...........................................110
41. Afarrey ma reebbana........................................112
42. Sow ibtilo maaha?............................................116
43. Alif ba..............................................................120
44. Allow Sahal Amuuraha!...................................126
45. Koris Wacan.....................................................129
46. Dugaag Deris Ma leeyahay?............................131
47. Ummadaha Maxaa Haga?.................................138
48. Rejaa Nolol Leh...............................................140
49. Aamiin inoo Dhaha!........................................142
50. Hoggaan Toosan..............................................144

51. Dood-wadaag....................................................145
52. Dhabbe Toosan................................................158
53. Caqli Dhab ah Allow na Sii!..........................161
54. Isagoon Birtiis Tuman.....................................163
55. Dadku Ha isla Joogo........................................165
56. War Ma Kala Dan Baan Nahay?.......................167
57. Dhalashadii Nebiga (Nnk)...............................169
58. Waa Wacad Ilaahay..........................................171
59. Yaa Baajin Kara Xumo?..................................173
60. Da'da Soo Koraysa..........................................174
61. Warxumada Guryaha Taal!..............................175
62. Gurmad.............................................................176
63. Doodey Maxaa Tahay?.....................................177
64. Ababinta Qumman............................................181
65. Yaa Ceebta Naga Dhaqi?.................................184
66. Daniba Way I Ciidsiin!....................................188
67. Dadku Kala Ayaan Roon..................................190
68. Nin Dafiri Dadkuu Dhalay!.............................197
69. Waalli Qaybo Badanaa!...................................199

# HIBAYN

Diiwaanka maansada *U Sahami Adoon Rarin* waxaan u hibeeyay dhallinyara Soomaaliyeed, gabdho iyo wiilalba, kuwaa oo la dhaawacay himmadoodii, nolashoodii, waxbarashadoodii iyo mustaqbalka sidii ay uga fikiri lahaayeen. Dambigaa waxaa ka galay dadkii dhalay oo ku guuldarraystay in ay dhisaan wax dhab ahaan uga dhexeeya ummadda e, cadow dibad ka yimid ka ma dumin himmilooyinkoodii iyo waxay mudnaayeen.

Dhallinyaro halgami oo
Hadaf toosan hagayoo
Himmo iyo go'aan laa
Habka nolosha tiir u ah
Dalkoodana habayn kara
Hagi kara dadkoodana
Habayn kara dareen mida
Hanka dowlad garan kara
Dhallintii hankaygaay
Iska hubi inaad tahay
Kuwaa hawshan qaban kara
Heli kara iftiin saxa.

# HORDHAC

Buuggaani waxaa uu kulminayaa suugaantii iyo maansooyinkii aan sameeyay intii waxgalka ahayd, bulshadana wax ku biirin karta marka ay dheehdaan isla markaana ay dhuuxaan macnaha maanso kastaa xambaarsan tahay.

Waa buug koobaya sooyaalkaygii suugaaneed. Inta badan waxaa la igu yaqaannaa bahda waxbarashada; muddo waxaan waday, ilaa haddana aan ku jiraa, dhiirrigelinta aqoonta guud iyo iftiiminta dhaqanka suubban oo ku salaysan Diinteenna. Waxaan dhihi karaa, maansadu waa aalad lagu fidiyo fikirka aad rumaysan tahay, sida dacwada, tarbiyada, iyo kobcinta garaadka.

Soomaalida suugaantu waxa ay u leedahay qiimo weyn, meel weynna way kaga taallaa. Suugaantu waxay indho iyo halbowlaba u tahay afkeenna hooyo.

Ilbaxnimada dadka Soomaaliyeed, aqoontooda, xilkasnimadooda, taarikhdooda iyo hodantinnimada afkoodaba waxaa laga akhrisan karaa suugaanta.

Waxaan waqtigayga badidiisa ku howllanaa arrimaha faafinta dacwada Diinta iyo waxbarashada kala duwan.

Soomaalidu waxay sida badan ama waligoodba wax ku cabbiran jireen, ilaa haddana ku cabbirtaan, waa suugaanta. Waxaan is wayddiiyay, ‘oo kaalay, haddayba Soomaalidu warka iyo farriimaha isu gaarsiiso hab maanso ama suugaan ah, maxaa adna kuu diidaya in aad dacwadaada iyo wax kasta oo wanaagsan u adeegsato kuna gudbiso maansada?’ Waxaa i la habboonaatay in aan suugaantayda samaha ku gudbiyo xumahana aan kula dagaallamo.

Soomaalida marka aad hab suugaan ama maanso ah war ama farriin ugu tebiso, way ka xiisayn og yihiin marka hadal caadi ah ama tiraab aad ugu tebiso.

Soomaalidu waa dad afkoodu hodan yahay, waxaadna

taas ka garan kartaa ama ka dareemi kartaa suugaantooda.

Buuggaan, *Usahami Adoon Rarin*, waa diiwaan ka kooban 69 maanso oo ah inta xiskayga ku jirtay ama aan is lahaa waa farriin aad ku gudan karto waajibaadka kaa saaran dadka iyo inta adeegsata afkeenna, taas oo aan is leeyahay bulshaduna wax ayay ka taransan kartaa.

# MAHADNAQ

Marka hore waxaa mahad oo dhan iska leh Allaha Jaliilka ah ee wax walba oo culus nooga yeela fudayd ee na baray qalinka, na siiyay maan togan oo aan wax ku xafidno kuna abuuranno, nabadgalyo iyo naxariisina dushiisa ha ahaato Nabigeenna Maxamed.

Marka xigta, waxaan mahad iyo abaal biirayba u hayaa cid kasta oo igu dhiirrigelisay in maansoyinkii aan curiyay u sameeyo buug lagu aruursho, si dadka ay tusaale iyo kaydba ugu noqdaan. Waxay igu dhiirrigelin jireen in ay maalin uun arkaan diiwaan lagu kulmiyay maansooyinkii aan sameeyay in ka mid ah.

Waxaa jira saaxiibbo lama-illaawaan u ahaa diiwaankaan oo aan dhihi karo awoodda Allaah (SW) ka sokow la'aan-tooda buuggaani dhakhsiiyo ahaan ku ma soo baxeen, dadka indhahoodana ma soo gaareen. Waxaa u horreeya oo waliba mahad aan duugoobin u hayaaCabdinaasir Yuusuf Macallin Xuseen iyo

Cabdiqaadir Cabdi Axmed (Jubba) oo waqti badan gali-yay toosinta iyo turxaanbixinta maansooyinka buugga ku kaydsan.

Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa Ustaad Mustafa Cabdullaahi Fayruus, maamulaha Machadka ISOS, oo taloo-yin wax-ku-ool ah diiwaanka ku soo kordhiyay.

Ustaad Ismaaciil Maxamed Cumar oo isaguna kaalin muuqata buugga ka qaatay.

Ilaahay ha barakeeyo qof kastoo gacan ka gaystay soo bixista diiwaankaan oo aan ku cabbiray dareenkayga qaarkiis oo u noqanaya dhaxalreeb looga tago jiilka Soomaaliyeed, fac ka fac.

Ilaahay abaalkiinna Janno ha ka dhigo.

# GOGOLDHIG

Dr. Cali Shiikh Axmed Abuubakar waa barbaariye, daaci faafiya Diinta Islaamka, aqoonyahan, xeeldheere magac wanaagsan iyo saamaynba ku dhex leh bahda waxbarashada, maansayahan afmaal ah, codkar hadalka heli og iyo aftahan aan hadalkiisa, kaftankiisa iyo sheekadiisa laga daalin.

Diiwaankiisa aad hadda gacanta ku hayso waa diiwaan ka duwan diiwaannadii maansooyinka Soomaaliyeed ama abwaannada laga qoray. Suugaantu waxa ay ka mid tahay awoodaha afku leeyahay. Marka ay timaaddo in la macneeyo suugaan, waxaa lagu tilmaamaa waxa koobaya wixii la tiriyo oo miisaan iyo qaafiyadba leh, kuna dhisan xaraf laga ilaaliyay laaxin iyo deelqaaf.

Jaadadka maansada (gabayga) waxaa ka mid ah ama suugaanyahaankeennu ay ka ambaqaadaan:

Ammaanta
Guubaabada
Faanka
Farriinta
Halxiraalaha
Digashada
Duurxulka ama sarbeebta
Naftii-hafarka
Hanjabaadda
Habaarka

Cayda iyo xifaalada iyo kuwo kaloo badan.
Dr. Cali Shiikh Axmed Abuubakar maansadiisu waa hidde oo wuxuu ka hiddaraacay reer abtiyaalkii oo ahaa qoys suugaanta caan ku ahaa magac dheerna ku yeeshay.

Marka laga hadlayo Dr. Cali Shiikh Axmed Abuubakar,

waxa uu ka gabyaa xooggana saaraa tarbiyadda, tacliinta ama waxbarashada, dibuheshiisiinta, diinta iyo fekerka Islaamka, dibudhiska dalka iyo wacyigelinta.

Buuggaan waxaa uu kulminayaa jaadad badan oo Soomaalidu ka maansoodaan, marka uu qofku si dhab ah u dhuuxana waxa uu ka helayaa xikmad, aqoon iyo rejo. Buugga oo ka kooban 69 maanso ayaan laga helayn maanso la nici karo ama lagu caajisayo.

**Cabdinaasir Yuusuf Macallin Xuseen**

# 1. SIDEED MADAX KU NOQON KARI?

Tartanka madaxtinnimada Soomaaliya ayaa dhacayey 2012, waxaana si is dabajoog ah warbaahinta kala duwan uga soo muuqanaayey murashixiin cusub oo ku soo biiriyay tartanka madaxtinnimada.

Waxaa maskaxdayda ka soo maaxatay farriin ku wajahan murashixiintaas oo tilmaan hufan ka bixinaysa waajibaadka culus ee laga sugayo kan Ilaahay calaf ugu daro kursigaas.

Jiiftadan waxay tusaale wanaagsan ka bixinaysaa tilmaamaha keeni kara hoggaan sax ah:

Inaad doonto madaxnimo
Dambi ma aha aad geli
Haddaad daacad tahayoo
Dadka aad ku dhihi kari
Wixii dumay dhammaan baan
Dib ka soo dhisaayaa.

Adoy daacad kaa tahay
Dalka inaad ku daaddihin
Dariiqii ammaanada
Durdurkii caddaaloo
Dadka siini nabad oy
Degganaan ku heli kari.

Oo ku daaban xooggii
Darbiyada xumaantiyo
Dulmiyada is wada koray
Noo diiday nolol wacan
Dalkeenniyo dadkeennii
Degdeg aad wax ugu qaban
Danta guudna aad hagi

Oo daryeeli ubadkaa
Darxumadu haleeshee
Laga dilay dareenkii
Dadnimadu u baahnayd
Loo diray xumaan aan
Cidna daawadeed helin.

Dadku waxay sugayaan
Madax dowladnimo garan
Daafici dalkoodoo
Dariiqay ku maamuli
Cilmi darajo weyniyo
Daacadnimadu ay hagi
Dadkuna qayb ka wada yahay
Dunidana heshiis la ah.

Darxumadaan ku noolnahay
Dadka wada halmaansiin
Oo ku hagi distoor aan
Dana gaara laga rabin
Dadkoo idil u siman yahay
Caddaaladdana deeqsiin
Diintana khilaafayn.

# 2. RAAD WANAAGSAN SII REEB

Meeshu waa Kambaala, hoteelka

Nyumbani, sanadkuna waa 2010. Waa hoteel ay Jaamacadda Muqdisho ku martigelisay 40 arday oo Maajisteer ka waday jaamacadaha Yugaandha (Uganda), horana uga baxay Jaamacadda Muqdisho.

Intii aan sugayey mas'uulkii ardayda hoggaaminayey ayaan dib u milicsaday meeshii aan ka soo bilownay Jaamacadda Muqdisho 14 sano ka hor iyo maanta halka ay marayso!

Markaas ayaan xusuustay in ay noloshu tahay ku-meelgaar dhammaanna laga huleeli doono, waxa qiimaha leh ee haraayana uu yahay wanaag la qabtay iyo shaqo waarta oo marka aad dhimato dhulka sii camiri doonta, inta kaa dambaysana dhaxal wanaagsan u noqon, adigana saad iyo ajir aan dhammaanayn uu kaaga socon.

Xikmadda "waari mayside war ha kaa haro" ayay ka curatay maansadaani "Raad wanaagsan sii reeb":

Raad wanaagsan sii reeb
Ka run sheeg waxaad qaban
Hana simin run iyo been
Rabbigaa caddeeyoo
Raadkoodu kala dheer!

Inay reebto halisiyo
Ragaad iyo dhib mooyee
Raandhiis ma laha been

Rug nagaadi bay noqon
Iyo raaxo daa'ima

Raynrayn macaaniyo
Raxmad Eebbe laga sugi
Haddaad beenta reebtoo
Runta hoy ka dhigataa.

Raad wanaagsan sii reeb
Ka run sheeg waxaad qaban
Bulshadana u roonow
Raalli geli dadkeedoo
Ruux lagu daydaa iyo
Rugta noqo caddaaladda.

Raad wanaagsan sii reeb
Ka run sheeg waxaad qaban
Haddii aan rag iyo dumar
Rabitaan ku duugnayn
In la taago raas dhab ah
Roobkiyo dabayluhu
Tiirkiisa ridi karin
Rasmi loo ma degi karo.

Wax kastoon run loo qaban
Rasmi looga wada talin
La rogrogin siduu noqon
Riyo beena ka ag daya
Oon ruuxna wax u tarin
Dhaxal saxana reebayn.

# 3. DADKA YAA WAX WADA BARA!

Farxaddu waxa ay leedahay albaabbo badan oo laga galo, taasoo keenta nasiino iyo daalbax.

Garoonka Istanbuul ayaan ka soo degay 2014. Waxaa si raynrayn leh ii salaantay gabar yar oo aad u faraxsan; intay kor u hadashay ayay tiri: Ustaadow, maxaad noogu imaan wayday? Anigu waxaan ahay ardaydii Jaamacadda Muqdisho oo Mastar ka wada Turkey. Mar labaad ayaan farxay oo aan dareemay in aan hor taagnahay ruux weyn oo soo dadaalay goosatayna in uu sii wado waxbarasho sare oo mudan in lagu sabro.

Wixii daal i hayay waan ka bogsaday. Mahad waxaa mudan inta ka qayb qaadatay dhismaha ubadkeenna soona gaarsiiyay meeshan qiimaha badan.

Waxaa igu soo dhacday oo markiiba maskaxdayda ka soo maaxatay maansadaan aan ugu wanqalay, “Dadka Yaa Wax Wada Bara!”:

Dadka yaa wax wada bara
Oo doorsha dhaqan xumo
Dabcigooda dhaawici!
Dadka yaa wax wada bara
Iyagaa dadaal bixin
Dariskooda nabadayn!
Dadka yaa wax wada bara
Iyagaa darxumo iyo
Dulli aan aqbali karin!

Dadka yaa wax wada bara
Iyagaa dadaal geli
Oo dowlad soo celin!

Dadka yaa wax wada bara
Dulmigaa carruurtiyo
Dumarkeennu la ilmayn
Cidina aan danaynayn
Cilmigaa daryeel u ah
Daawadiisa noqon kara!

Dadka waxaa beddeli kara
Dariiq toosan marin kara
Dalkoo idil midayn kara
Dib u dhiskiisa qaban kara
Difaaciisa hanan kara
Aqoon iyo dadaal wacan
Anshax lagu daruuroo
Dadkoo loo adeegiyo
Tiirkeennu diin yahay
Dadweynaha dhammaan iyo
Da'yarteenna soo kici
Duruus looga wada dhigo.

Distoorkuna sidaa qiri
Hanti guud la daayicin
Caddaalana la daa'imi
Hawsha dowladdeennana
Musuqmaasuq lagu dayin
Kii laga dareemana
Dadku ay casilayaan
Maxkamana u dirayaan
Dibna uusan xukun qaban.

# 4. U SAHAMI ADOON RARIN

Waxaa ay tixdaani ku timid hadal uu yiri nin ka mid ahaa Jabhaddii USC oo ku noolaa magaalada Muqdisho, ninkaa oo la yaabay sida ay dadka u dilaan haddana madax ugu noqdaan, heeganna u yihiin daafacooda marka ay u baahdaan oo daraaddooda u dhimanayaan gar iyo gardarraba.

Waxaa uu ahaa nuxurka iyo macnaha hadalkiisu, "Dadkayagu wanaagsanaa; waan dilnaa wayna na doortaan, waana na difaacaan." Markaan maqlay hadalka ninkaas, waxaan cabbiray si toos ah macnaha uu leeyahay warkiisu. 15-ka meeris ee hore waa hordhaca u sahami adoon rarin:

Waxaan ahay nin dooroo
Dambi weyn sameeyoo
Dadku wada qaddariyaan.

Waxaan ahay dilaa weyn
Oo dumiyay Qarankiyo
Dalku wuxuu ku taagnaa.

Wax kastoon daneeyana
Dadku wuu i siiyaa
Iyagoon ka doodayn.

Dalka aniga yaa lehe
Kaan rabo markaan dilo
Way i daba galaayaan.

Haddaan dollar qaybshana
Dareenkooda yaan helay
Markaasay i doortaan!

Waa yaab, marna waa ciil! Ma sidaasaa hoggaan ummadeed? Qaabkan wuxuu dhashaa marka waxgaradku ka gaabsho waajibaadkiisa, hoggaan aan ogayn masuuliyadda saaran macnaheeda madax ma aha ee waa budhcad xoog ku jooga:

Haddaad dili dadkaagiyo
Haddaad dumin dalkaagaba
Doqon cadow habaystiyo
Mid habowsan baa tahay
Halis iyo dhib doortiyo
Shaqo aan hagaagayn
Aan haybsan karin guul
Jabkeeduna hubaal yahay.

Hoggaannimadu waa shaqo
Hadal aan waxqabad wadan
Hantaaq kaa ma saaroo
Hanti run ah ma keenoo
Hoos kugu ma deeqoo
Hab siyaaso wacaniyo
Nabad soo ma hooyee
Iska hubi hayaankoo
Haaneedku yuu lumin.

Iska hubi hankaagiyo
Hilinkaad maraysiyo
Himmadaadu meeshay
Haabhaabanaysoo
Higsanaysidood tagi
Geed hoos qabowliyo
Hawd wada barwaaqa ah
Dadku wada heshiis yahay.

Adoo hoos u wada dayay
Habka nolasha oo idil
Hadayaanka qaadkiyo
Haasaawe beenoon
Hal-abuurba curin karin
Yuu hodin naftaadoo
Mugdi halis ah kugu ridin
Hantaaq beena kuu qodin.

Horusocod adoo huba
Inaad hayso maabkoo
Hubiyoo rogrogay oon
Hurdin oon riyoonayn
Male beena ku hadlayn
Hilinkaagu falanyahay
Himmaduna sax kuu tahay.

Horusocod adoo huba
Inay talo habboon tahay
Sahankuna hormuud yahay
Sahayduna hubaal tahay
Sabirkuna horseed yahay
Oon halmaamin dawgii
Dadku khayrka ka heleen
Iyagoo halgamay oo
Manhajkooda haystoo
Ku hanuunsan diintiyo
Habka nolosha kala wada
Marna lagu hungoobayn.

Horusocod adoo huba
Inaad guusha hanan kari
Ummaddana hoggaan u ah

Kana daalin hawlaha
Dalka lagu hormarin karo
Lagu hagi dadkiisoo
Hoy nabad u noqon kara.

Horusocod adoo huba
Hab-guuleed inuu iman
Markaad hubiso hadafkiyo
Hawl qabad siduu yahay
Adigoo hab dhaqan loo
Himilada dadkaagiyo
Meeshay higsanayaan
Hanad aad u noqon kari.

Hor u socod adoo huba
Inaad hagar la'aan fulin
Hawlaha dadweynuhu
Hadaf uu ka yeeshoo
Himmadooda soo celin.

Adoo huba waxaad qaban
Iyo hawsha kuu taal
Iyo halista badan ee
Howdkaad maraysiyo
Kugu sugi halkaad tagi

Hor u soco adoo huba
Hoggaan dhaba inaad tahay
Danta guudna aad hagi
Ood hayn caddaalada
U horseedi nolol aan
Dulmi lagu hadhaynayn
Dadku wada hadhsanayaan

Daawaysa hoog iyo
Darxumiyo halaaggii
Dadku halis ku wada galay
Dalkoodii halmaameen.

Hor u socod adoo huba
Inaan ruuxna haynayn
Hantidiyo kursiga iyo
Habka bilicda nolashee
Dadku wada hamminayaan.

Hortaa jiraba waayoo
Ka huleele meeshaad
Habsamida u sii dagi
Ood moodi hoy runa
iyo hodanti daa'ima
Hantideedu guurayn
Hubaal tahay barwaaqadu.

Hor u socod adoo huba
Haddaad haybad joogtiyo
Magac aan hadhayn iyo
Sharaf sidaad ku heli kari
Hodan aad ku noqon kari
Halgan weyn adoon marin
Wali hoos u soo galin
Haydaaro xukunkeed
Iska hubi in aad tahay
Mid habkiisu wacanyahay
Amaan hawsha sii dayn
Xugunkana aan haynayn
Ka haajiri siyaasada
Hoy nabad u noqon kara.

Hor u socod adoo huba
Inaad noqon halyey iyo
Hanad lagu nastaa oon
Ka habaabin madashay
Dadku wada higsanayeen
Dantoodana u hagi kara
U horqaadin meel daran
Duco iyo wanaag hela.

Halis weyn adoon marin
Hoos moolka ugu degin
Iska hubi inaad tahay
Haaneedka guushiyo
Hilinkeed mid aan garan
Sahanka aan hor mari karin
Hawshiisu male tahay
Hantaaq iyo dhib soo wada
Iyo mahadho aan hadhin
Ubadkuna halmaamayn
La higaadin waligeed
Dambiguna halkiis yahay
Hooskiisa daba socon
Dadku wada habaaraan
Aakhiro hadduu tago
Mudan kara halaag culus.

# 5. WAQTIGIISA DHUMIYE

Waxaa halhays inoo ah oo aan isku salaannaa marka aan kulanno “Subax ama Galab wanaagsan!” Haddaba, su’aashu waxa ay tahay, waqtiga wanaaggiisa maxaa lagu cabbiri? Iska ma wanaagsanee waxay sidaas ku noqon kartaa in laga faa’iidaysto oo uusan meel cidla’ ah ku lumin.

Tixdaani waxaa ay qayb ka ahayd dood an la galay dhallinyaro Soomaaliyeed oo aan Facebook-ga saaxiibbo ku nahay.

Taariikhdu waxa ay ahayd 29/03/2011:

Waqtigiisa dhumiyaa
Nolashiisa dhumiyee
Ma og tahay dhabbaha xumi
Dhan walbood u qaaddaba
Inuu dhimasho kugu yahay?

Kuwa dhumiyay xooggee
Gaajada u dhiman ee
Dhallaankoodi ciil dilay
Waqtigoodi baa dhumay
Oon dhinac san laga marin.

Dadka dhumucda weynee
Dhallaankoodii ciil tiray
Dhan walbood ka eegtaba
Waqtigoo la dhawriyo
Ummad dhab u midowdoo
Dhinac qura u jeedday
Inta kale ku dhaafeen

Horukaca dhammantiis

Dhib yaraan kumuu iman
Fikir loo dhab galay iyo
Maal dhumuc leh yaa galay
Dhidid baa u daatoo
Dhiig baana loo qubay.

Cilmi dhaqan abuuraa
Dhidibbada u aasoo
Dhismihiisa hor u wada
Wixii dhiba ka daafici.

Dibudhaca dhammaantiis
Waxa dhala waqtiga dhuma
Waa dhaqan xumaadoo
Muddo dheer lasoo waday.

Meel dunida dhaaftoo
Ka dhamaaday nuxurkii
Dhadhan iyo nacfiba qabin
Dhib oo idil u dheertahay
Kuwa dhigay dhashoodii
Caqli dhumay ayaa hagi
Dhinac kalena ma arkaan.

Ma dhibaan naftoodoo
Shaqo u ma dhaqaaqaan
Markay baahi dhalatay
Dhammaantood gadoodaan.

Waqtigiisa dhumiyaa
Nolashiisa dhumiyee
Shaqo dhaba adoon hayn
Ha is dhihin wax baad tahay.

Ma og tahay dhabbaha xumi
Dhan walbood u qaaddaba
Inuu dhimasho kugu yahay?

# 6. DHIMASHADA HA YEELINA!

Waa tix kaloo ka mid ah doodihii aan dhallinyarada kala qayb qaatay barta bulshada ee Facebook, 29/03/2011 .

Dhallinyaradaasi qaar ka mid ah waxaa ka muuqday niyadjab foolxun. Waxaad mooddaa in la isu dardaarmay quus markii dhibaato ka hor timaaddo! Waajibka ina ka saaran bulshada waxa uu keensan in aan geesinnimo galinno da'yarteenna oo loo sheego in ay qaban karaan waxaan cid hore qaban:

Dhulka aan ku noollahay
Rabbina uu dhammaystiray
Dadkaa dhaxal u yeeshoo
Loo dhiibay taladow
Ha is dhiganin waligaa
Soo reeb wax dhaxal gala.

Dhallin aan han weyn qabin
Khayr ku ma dhaqaaqaan
Dhanka fiican noloshana
Ma arkaan dhabteedii

Mugdigay dhex jiifaan
Aragtiduna dhimmantahay
Yaa dhumin dadnimadoo
Caqligooda dhimir tiri?

Dhaqan xumo la daayimo
Ku salaysan dhiilliyo
Dhalanteedka lagu jiro
Dhibtu joogto ay tahay
Waqti dhumay ayaa dhalay.

Dhalinyaro waxaad tahay
Dhumucdii dalkeennee
Dhanka fiican aragtida
Dhinaceed ha seegina.

Dhaqan hawlkar wada hela
Dhabbe toosan wada mara
Baashaal dhibtiisiyo
Haku dhicin god iyo dabin.

Dhaawaca dalkiiniyo
Dhimashada dadkiinnaba
Ha ku dhawranina saas
Shaqo dhaba ayay tahay
Nolol dhab ah wax la imaan
Sabankana dhaqaalayn.

Ajashiinna oo dhimman
Waqtiguna dhammaan wali
Ha ka dhicina noloshoo
Dhimashada ha yeelina!

# 7. DADKU MAXAY CODSANAYAAN?

Adduunka waxaa ka socda isbeddello aad u waaweyn oo ku saabsan qaabka siyaasadeed ee lagu hoggaaminayo shucuubta. Heerar kala duwan ayay soo mareen isbeddellada bulshadu, waxa ayna ka soo gudbeen dhibaatooyin badan.

Waxaa la gaaray in la helo qoraallo caddaynaya waxa ka dhaxeeya xukaamta iyo shucuubta oo qeexda waajibaadka iyo xuquuqda uu dhinac walbaa leeyahay, taas ayaana keentay in la la xisaabtamo madaxda ku timid codka shacabka.

Haddaba, shacabka Soomaaliyeed madax ma leeyahay? Ma soo doortaa dadkuu rabo? Ma xisaabin karaa ruux laaluush ama qori afkii ku yimid kursi?

Waxaa igu soo riday gabaygaan markaan arkay sida loo arko madaxtinnimada ee dhibta yar. Waxaa is wayddiiyay yaad dooran lahayd haddii cod lagu kala bixi lahaa? Maxaad ka codsan lahayd in ay sameeyaan, darajo kastaba ha ahaatee? Maxay tahay tilmaamaha uu yeelan lahaa ruuxa loo dooran mansab, maxaase loogu diidi lahaa darajo siyaasadeed inuu qabto?

*Dadku Maxay Codsanayaan?* waxa dareenkayga ku beeray doorashooyinka qaabka daran ee la joogteeyay:

Madaxnimo midkeen geyin?
Haddaad darajo gaartoo
Dalka madax ka noqotaa
Qabbaan baad dadka u tahay
Dantoodaad u joogtaa
Dareenkaaga taa geli
Dibna waa xisaab dihin
Ceebteed la daabici.

Waxaad doorataad heli

Ku dadaal waxqabad iyo
Danta guud adeeggeed
Daawee dulmiga iyo
Musuqmaasuq daa'imay.

Dadku waxay barteen bay
Dib u galin dalkoodee
U dadaal waxbarashada
Eedaha dadweynaha
Dacwadaha is daba taal
Ha ka didin is wayddii
Dadku muxuu codsanayaa?

Dadku waxay codsanayaan
Dalka inuusan maamulin
Oo aan xil loo diran
Duulkii wax soo dilay
Danbiyada culculus galay
Sidii cadow la soo diray
Ku danaystay maalkii
Dadku ay lahaayeen
Darxumiyo halaag baday
Dalkeenniyo dadkeennii
Oo dumiyay Qarankiyo
Wax kastoo dadku lahaa.

Dadku waxay codsanayaan
Dalka inayna maamulin
Damiir laawayaashaas
Dalka aan halgan u gelin
Dadka aan wax soo tarin
Daydayi wax boob iyo
Dulmi xoolo lagu helo

Durba ay ku taajiri.
Dadku waxay codsanayaan
Dalka inayna maamulin
Kuwa aan daryeelayn
Inta tabarta daran ee
Duqaydiyo carruurba leh
Dumarkana xaqood marin
U dadaalin kooxaha
Darajaday mutaan iyo
Xaqoodii la duudsiyay
Dulmi looga dhigay saad
Dhib yaraanna lagu dilo
Iyagoon dambiba galin.

Dadku waxay codsanayaan
Dalka inayna maamulin
Kuwaa dumiya qoyskee
Daayaca carruurtiyo
Dumarkay is yeesheen
Danahooda qaban jiray
Carruurtana daryeel iyo
Daaddihin ku korin jiray.

Dib u eeg su'aashee
Nin dulmiyay qofkii uu
Dadka idil ka door biday
Danta Qaranna hanan karin
Dadku siday ku aamini?

Madaxnimo ayaa mudan?
Dadku waxay codsanayaan
Dalka inuu hoggaanshaa
Kii dooni madaxnimo

U durdurin siyaasada
Mid danayn inuu yahay
Dadkoo nabad ku seexdoo
Dareen caafimaad qaba
Wixii dumay dhammaantiis
Dib ka soo dhisaayoo
Danta guud kobcinayoo
Diyaar hawl u noqon oo
Dulmigana ka dheeraan.

Dadku waxay codsanayaan
Dalka inuu hoggaanshaa
Mid jacayl daryeeloo
Dawladdiyo dadweynaha
Dareenkii wadaninnimo
Dib u beera oo korin
Sidii ul iyo diirkeed
Dadku inay masoobaan
Dulmi waan dhadhaminnee
Caddaalada la doorbido.

Dadku waxay codsanayaan
Dalka inuu hoggaanshaa
Madax daacadnimo iyo
Dareen runa xanbaartoo
Dadka been u sheegayn
Ka daweyn wixii hore
Oon duminnin diintay
Dadku wada rumeeyeen.

Dadku waxay codsanayaan
Dalka inuu hoggaanshaa
Madax dawladnimo runa

Dariiqeeda qaadoo
Dalkeennaa rafaadsani
Darka nabadda ka cabboo
Doogeeda ku xasila
Dagaalkana horjoogsada.

Dadku waxay codsanayaan
Dalka inuu hoggaanshaa
Isagoon dulmi aqbalin
Xuquuqdiisa daafici
Intaan dariska nahay iyo
Dawladaha adduunyada
Dan wadaag la noqon kara
Dhaqaalahana daaddihin
Wax kastoo dulmi ahoo
Dadku uu macaansaday
Daallimiinta xoogga leh
Dadkoodii ku taajiray
Kii dumiyay noqon kara.

Dadku wuxuu ku leeyahay
Haddaad dooni madaxnimo
Dabinnada laguu dhigi
Dad yaqaanna sooheen
Een dowladnimo iyo
Dariiqeeda kula rabin
Adigoon digtoonayn
Ama dooni qaabkuu
Nacabkaadu daydayi
Kolba dabinno kuu dhigi
Degdeg ha ugu dhicin taas
Dhulkaagana ha beec gayn
Adoo dooni madaxnimo.

Tusaalaha mid koobaad
Ku dadaal intaad kari
Distoorkiyo wuxuu qori
In aan doodi ka imaan
Dowladdana sharcigu wado.

Tusaalaha labaadkana
Ku dadaal intaad kari
Maalkaa dalkeennee
Dadkoo idil sugayaan
Dulmi inuusan meel marin.

Tusaalaha hal saddexaad
Ku dadaal intaad kari
Daryeelnimo waxbarashoo
Dadkoo idil helaanoo
Daaweyn aqoon xumo
Noo diidday nolol wacan.

Tusaalaha afraadkana
Ku dadaal intaad kari
Diinteenna sharafta leh
Dariiqeedu falanyahay
Daryeel oo ha daayicin
Xukunkeed hadaba marin
Distoorkuna ha waafaqo
Ha daydayin wax kale oo
Dadku uusan yeelayn
Dagaalladana sii hurin.

Isku dire dadkiisiyo
Dawladdiis ha noqonine
Ku dadaal heshiisiin

Dadkaagiyo dalkaagiyo
Diintaba midaysoo
Dariiq qudha ay qaadaan
Dibna loogu noqon falal
Qarankeennii dumiyoon
Wali daawo loo helin!

# 8. QALLOOCEENNA YAA DHALAY?

Tixdani waxaa ay tilmaam u tahay xaaladda murugsan ee aan ku sugannahay ee ina addoonsatay muddo aan yarayn, taa oo aan laga garaabin wali.

Waxaa yaab leh sida aan u qabatinnay haddana aan isku la qummannahay!Dhaqankaa qalloocday oo ku faafay dhan walba oo aad eegto ayaa keentay maansadan, *Qallooceenna yaa dhalay?*:

Dhibaatadan maxaa dhalay
Dhasha iyo da'weyntiyo
Dhaqanraac duqaydiyo
Madaxdii la dhaarshiyo
Cilmi dhuuxayaashii
Dhanka toosan daba marin?

Dhibaatadan maxaa dhalay
Dhallaankii burburisoo
Dhabarkooda jabisoo
Dhabqinaysa kobacana
Dhan walbood ka eegtaba
Is xilqaanka dhaawacay?

Dhibaatadan maxaa dhalay
Dhallinteenna xoogga leh
Dhib yaraan la jiifaan
Oy ka dhawri hawlaha
Dad kaloo dhaqaaqoo
Xilka dhabarka saartoy
Dhididkooda quutaan
Ka dhargaan waxay siin
Dhib la'aanna noolaan?

Dhibaatadan maxaa dhalay
Oday dhaqamadeennii
Dhulku uu ku noolaa
Dhawri jiray wanaaggoo
Dhirta nabadda beeroo
Markii uu wax weyn dhaco
Ku dhaqaaqi jiray hawl
Dhanka fiican loo wado
Inay maanta dhiilliyo
Dhibta iyo xumaatada
Dhinaceeda doortaan
Dhaqankiina lumiyaan?
Dhibaatadan maxaa dhalay
Oo dhaarta beenta ah
Dhib yaraanta loo mari
Dhammaan la isma raacee
Dhinacyada xumaantiyo
Kuwa dhiirriyaa badan
Inta kale ku dhowraan
Dhab ahaan an loo qaban?

Maxaa dhaarta loo mari
Haddaan madaxdu dhawrayn
Dhab ahaan u fulin karin
Ballantay ku dhaartaan
Oon laga dhabaynayn
Waxay dhaartu mudan tahay
Dhaqan dowlo laga fili
Dhulkuna uu ku nabad geli
Dadkuna aay dhibaatiyo
Dhalanteedka kaga bixi?

Dhibaatadan maxaa dhalay
Kuwii qalinka dhuuxee

Aqoon dhumuc leh yeeshee
Dhadhansaday waxbarashada
Dhibaatadu markay timid
Madax dhaba ma ay noqon
Dhulka waajibkiisii
Lama gudan dhammaantiis
Dhiilliyo colaaduhu
Markay dhiigga daadsheen
In badani ma dhiidiyin
Dhulka way ka yaaceen
Dhankooday cidleeyeen
Dhabankaag ayaa dhacay
Iyo waxaan la dhawrayn?

Dhab ahaan u eegoo
Dhan walbaba ka fiirshoo
U dhaadhiciya hoosoo
Maskaxduna ha dhuuxdee
Jawaab dhaba ayaan sugi
Oon ka dhawri wadartiin.

Dhib yaraan fudayd iyo
Dhayal yaysan nagu marin
Dhibtu waa mid guud oon
Nolosheenna dhaawici
Ama keeni dhimashiyo
Dhulkeennoo wareegoo
Dhaxal ay u qaataan
Kuwo aan wax dhawrayn
Dhabarkeenna jabiyoo
Dhabta dowladnimo dila
Dhaqankiyo caqiidada
Ku hubsada xabaal dheer
Oo dhimasho lagu hubo.

# 9. QURBAJOOG DHAMMAANTIIN

Waxa aan dhagaystay dood furan oo ka socotay makhaayad ku taalla London, 2011. Waxaa isu jiibinaayay warka dhallinyaro wax baratay oo isku aragti ka ahaa dhibaatada ku haysataa dalka Ingiriiska.

Markaan wayddiiyay 'maxaa idin la gudboon mustaqbalka? Dalkii ma ku laabanaysaan mise halkiinnaan ayaad iska joogaysaan?', j

awaabtoodu waxay ahayd in ay si kumeelgaar ah ugu sii noolaanayaan dalka ay hadda ku sugan yihiin.Waxaan wayddiiyay 'maxaa keenay aragtida kumeelgaarka ah, maad si rasmi ah u degtaan; maxaase diidaya arrintaasi?'

Jawaabta ma aysan caddayn, badankoodana go'aan ka ma muuqan.

Waxaa aad ii xanuunjiyay in ay ka soo qaxeen dhulkoodii hooyo, kii hiilka magan siiyayna ay la qabsan waayeen. Waa dhan walba seeg! Hal laba geel oggol dhexduu bahal ku cunaa. Sidaa ayay tixdani ku timid:

Qayb 1:
Maqax daa'imaad tahay?
Dadkaygii dhibaatadu
Dhulka ay ka saartee
Dhammaan caalamkoo idil
U dhoofoo qaxooti ah
Weli aan saldhigan baa
Igu dhalin dha'laydane
Daalacdoo dhagaystoo
Dhugta iyo qalbiga dhiga!

Waa sadarro dhiilliyo
Ku salaysan dhaawaca

Iyo dhiigbax culusoo
Dhibiibtirid dawaysiyo
Dhugmar looba helin weli.

Kuwa dunida dhaafiyo
Inta dhimatay hadal ma leh
Dhawaaqaygu wuxuu yahay
Dhambaal aan ku leeyahay
Qurbojoog dhammaantiin
Dhab u eega nolashoo
Dhugta oo ka fiirsada.

Qurbajoog dhammaantiin
Dhab u eega nolashiyo
Dhab ahaan colaadii
Dhalyo duul sokeeya ah
Dhex maroo dorraad dhacay
Dhacdooyinkii la soo maray
Dhabbaheedii lagu ba'ay
Iyo waxay dhib gaysteen
Iyo dhoof qaxiinnii
Dhereg li'i ma keenine
Dhib ayaad ka carartee
Wixii dhacay bal ii sheeg
Yaa darinta kuu dhigay?

Qayb 2:
Sooryada ka mahad celi
Qurbajoog dhammaantiin
Dib u dhawra xaalkoo
Wixii dhacay xusuusta e
Kolkii aadba dhoofteen

Dhulal kale u cararteen
Yaa dhagaystay cabashada
Iyo waxaad dhib sheegteen
Oo idin dhaweeyoo
Mar labaad aad dhalateen?

Dhab u eega nolashee
Qurbajoog dhammaantiin
Dhulka aad ku nooshahay
Dhankuu dunida kaga yaal
Gurigaad ku dhaqantahay
Handasada dhammaystiran
Injinneerro dhuuxeen
Markii ay dhisaayeen
Dhan walbaba ka eegeen
Oo loo dhammaystiray
Dhammaan waxaad u baahnayd
Dhex dagtood ku nooshahay
Maxaa dhaliyay sheekadan?

Dhab u eega nolashee
Intaa ku ma dhammaannine
Dadnimada la dhowroo
Maal dhumuc leh lagu daray
Caafimaadna dheeryahay
Iyo dhalasho buuxdoon
Hoos kuu dhigaynoo
Dhibtii aad ka timid iyo
Dhaqan loo ma ooyaan
Dhib yaraanna lagu dili
Aan kaa dhigayn abid
Nasabkana aan dhaawicin
Dhinacna kuu xaqiri karin

Dhammaan waxaad u baahnayd
Dhaqso aad ku heli kari
Xuquuqdaa dhammaanteed
Qaanuunka yaa dhigi.

Dhab u eega noloshee
Maxaa dhaliyay qaabkaas
Dhammaan waxaad xaq leedahay
Dhanka hawshu taalliyo
Dhabbihiisa aad garan
Dhaqso aad dacwoon kari
Dhib haddaad dareentaa.

Qayb 3:
Ma danayn siyaasadda?
Dhab u eega noloshee
Waxaa dheer intaas wali
Dhinacyada siyaasadda
Dhab ayaad u gali kari
Haddii loo dhammaystiro
Dhaqammada hormarin kara
Dhanqaryiyo xumaan aan
Sumcaddaada dhaawicin
Ka ilaalin dhooqada
Siyaasiga ka dhawrsoon
Dhulkaad madax ka noqon kari
Down Street-na aad dagi
Iyo aqallo dhaxalgala
Dhaqaaliyo amniga iyo
Dhabta xukunka laga hago
Dhib yaraan ku dumi karin.

Qayb 4:

Gogoshaada meel dhigo!
Dhab u eega nolashee
Haddaad dhab u shaqaysaan
Tii laysku dhaafiyo
Dhibta aad xambaartaan
Dhaqammada xun tuurtaan
Sharaf aad u dhaqantaan
Dhulkaad joogto inuu yahay
Kaagii dhabta ahaa
Dhallinyaro la aammino
Uu dhuuxa kaa galo
Ood dhaar ku mari kari
Dhib kastoo timaaddana
Ka ilaalin dhaawaca
Una dhiman daraaddiis
Dhankaagana difaac gali
Marna cadow u dhiibayn.

Canshuuraha dhammaan iyo
Bixin kari in dheeri ah
Sidaas baad waddani dhabah
Dhib yaraan ku noqon kari
Oon dhaawac dila qabin
Oon dhawr dal kala degin
Geeddi aan dhammaan iyo
Kolba dhinac u guurayn.

Aqalkaad dhisaysana
Dhidibbada u aasoo
Dhaqso yuusan kaa dumin
Oon maabku kaa dhumin
Dhan walbaba ha seegine
Gogoshaada meel dhigo!

Qayb 5:
Go'aan dhiirran qaadoo
Ka dhabee inaad tahay
Buur dherer badanoo
Dhaqso aan la dumin karin
Dhabta nolosha hagi kara
Dhallaankiisa korin kara
Dhib kastoo timaaddana
Dhaqankiisa hayn kara
Oon diinta dhaawicin
Iyo sharafta dhaqameed
Dhulka madax ka noqon kara
Cidna maya aan dhihi karin
Qalad loo la dhaqan karin
Markaad dhawrto xeerkiyo
Sharciyadu siday dhigi.

Dhab u fulin wuxuu qaban
Caddaalana ku dhaqi kara
Oo dhaqanka eexdee
Midnimada dhibteeda ah
Dhaqaalahana taakayn
Dhabbihiisa soo marin
Caddaaladu siday dhigi
Ku dhaqmoo ilaalshoo
Dhanna aan ka mari karin
Dhaar culus ku mara oon
Cidna dhaafin karin taas
Intay nolashu dhaqan tahay
Waqtiguna dhammaan wali
Dhulkana aan ku noolnahay.

# 10.KHUDBASIRO MA GUUR BAA?

Da' ahaan ka ma aysan weynayn guga labaatanka. Waxay ahayd gabar degganaan iyo dadnimo u dhalatay oo Ilaahay uu karti siiyay. Wajigeeda waxaa ka muuqday in dhib culus uu soo gaaray, kaasoo dhaawacay dareenkeeda.

Gabadha hooyadeed waxaa lagu dhex dilay dukaan ay ku lahayd Xaafadda Taleex ee degmada Hodan, Muqdisho, Ilaahay ha u naxariisto e, waxaana dilkaasi gaystay niman mooryaan ah. Hooyadeed waxa ay aqoon wanaagsan isu lahayeen walaashay oo aan wayddiiyay bal in ay soo ogaato dhibka gabadha haysata.

Gabadhii si wanaagsan oo aan qaris lahayn ayay walaashay ugu soo warrantay, maaddaama ay darisnimo iyo habaryarnimo ka shinsanayso. Sheekadii gabadhu waxa ay u dhacday sidaan:

"Waxa aan khudbasiro ku guursaday nin xaas hore leh. Ruuxna yuusan maqlin guurkeenna ayuu igu yiri. Wuxuu iga ballan qaaday in uu guri wanaagsan i dajin doono, anna waan aamminay hadalkiisa. Waxa aan ku kulmi jirnay hoteellada qaar iyo meelo qarsoon. Muddo markii aan sidaas ahaa ayaan isku arkay dabeecado aanan horay isugu aqoon iyo astaamo igu cusub. Si qarsoodi ah ayaan baaritaan isugu sameeyay waxaana la ii sheegay in aan uur leeyahay. Aad baan warkaas ugu farxay, anoo aamminsanaa in ay hadda farxaddeennu kow tahay, ubax iyo rejo fiicanna ay soo dhowdahay, maalmo kadibna aan tagi doono gurigii la iga ballanqaaday. Isagii ayaan is aragnay anigoo dherarayey kulankeenna, maaddaama aan xanbaarsanahay farxad. Sheeko iyo kaftan ka dib, waxa aan u sheegay in aan bishaaro uur leeyahay, anigoo waliba qoslaya oo dhoola caddaynaya wajigana xishood dumar hoos u dhigaya.

Inta uu wajigu madoobaaday ayuu igu yir, “waqtigan miyaa uur loo joogaa? Uurka aad sheegaysaa muxuu yahay?” Hadalkiisaas ma aanan fahmin ujeeddada iyo biyadhaciisa, waayoo caqligaygu wax badan ii ma kala goyn karin. Waan soo kala tagnay.

Maalmo yar ka dib ayaan kulannay oo uu ii yeeray, wuxuuna igu yiri “WAAN KU FURAY EE OGOW!” Dhulka ayaa ila wareegay, wax aan sameeyana ma aan garan iyo meel aan wax ka bilaabo!Dhiig ayaa iga yimid ah ilmihii caloosha ku jiray oo soo qubtay. Xanuun ayaan ka qaaday naftayduna waa ay sigatay.”

Sheekadaas aad baan uga xanuunsaday, nacaskaas siduu meel cidla’ ah uga helay ayuu haddana meel cidla’ ah ugu tuuray oo kaga tagay markuu dantiisa xumayd ka gaaray; misana uu dumiyay mustaqbalkeedii, sharaftii gabarnimo iyo waxay rejo lahayd oo dhan.

Waa bahal suurad dad leh oo cunaya hilibka carruurteenna, kaligiina ma ahee kuwo badan oo caamo iyo culimmo-ku-sheeg ah ayay waxani shaqo u tahay oo magaca Diinta xaaraan la hubo ku fulin.

Waa maanso ka dhalatay murugtaas gabadha rajada ah qabsatay. Kumannaan ayaa la mid ah oo u baahan in bahallada laga dhiciyo.

Bal eega dabinnada iyo boholaha dadan ee lagu dili mustaqbalkeenna!

Guurku waa nolosha tiirkeeda; waa farxad iyo rayn rayn loo mashxarado; waxa loo qarin khudbasiro waa nooc tuuga ah oo ku abtirsan xaaraanta. “Xalaal iftiinbaa la qashaa”:

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Xanuun badan wuxuu helay

Boqollaal xarraga badan
Xushmo sharaf leh lagu dhalay
Xaafiday akhlaaqdoo
Xumaan idil ka saahiday
Guur xalaala sugayiyo
Nolol xiisa badan iyo
Wiil xaalad wacan oo
Masuuliya xanbaaroo
Xilka qoyska hanan kara
Xisaabtuna hal ay tahay
Xurma waalidiin iyo
Aroos xiise badan oo
Guurkoodu ku xasilo.

Xanuun badan ayaa jira
Xilligay koraayeen
Maxay halis xuluusheen
Himmadoodi laga xaday
Xariif been-hawaasoo
Xaasidoon runba aqoon
Xisaab beena uu furay
Gabdhaheen xal moodeen
Xaqoodii ku baaba'ay!

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Xaaladdeeda murugtee
Xuquuq dumar ku waayeen
Ma xalaal la hubo oo
Xag Ilaah ka timid baa?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?

Ma xashaash cuddoon oo
Mudan inaan xurmaynnaa
Ku xasili nafteennoo
Xuquuqdoo la duudsiyo
Xumaan iyo dhib joogtiyo
Xanna aysan daba ool?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Mise xeelad hoosoo
Xadhko dabinna badan iyo
Xaaraan la qarin baa?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Mise xukun ka carar iyo
Xuquuqdoo la diidiyo
Xumaan loo qasdaa baa?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Mise waa xariifnimo
Nafta xiisa galin oo
Sino lagu xalaashado?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Mise waa xil diidnimo
Xaqa lagu dabooliyo
Xabaal hoose galiyoo
Dibna aan xusuus mudan?

Khudbasiro xal waariyo

Guur xalaala may tahay?
Mise waa xisaab maal
Lagu xoogsanaayoo
Xaaraanta lagu qarin
Xogna aan la sheegayn?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Mise oday xarraamoo
Xaqii qoyska dumiyaa
Xilkuu qaaday nacay baa
Xaaskiisa kaga taga?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Mise xiiso dumar oon
Xaal saxa la marinoo
Xero raaxa mooddoo
Xil kastoo dul saarnaa
Ku xabaalay sababtaas?

Khudbasiro xal waariyo
Guur xalaala may tahay?
Mise waa xusuus wacan
Jacayl xaaladdii dhalay
Ubad xoog u soo kacay
Xadhig guur maleegoo
Xumaan waalid uu wado
Xaqoodii ku waayeen
Oo laga xayuubsaday
Xornimiyo dadnimadii
Xuquuqduu lahaan jiray?

Ninkii guur xalaal raba
Xeerkiisu saxanyahay
Jid qudhaa xalkiisoo
Xisaabtiisu saxantahay
Laga xiisa goyn karin
Haddaan xeelad xumi jirin
Xeerkiisa la khaldayn.

Xadiiskii Rasuulkiyo
Quraankaa xadeeyaye
Xadhigooda ku adkoow
Xeradooda ku ekaw.

Xatooyiyo war hoosaad
Xaflad runa aan loo dhigin
Dadku xaadir ku ahayn
Xoog loo mashxaradayn
Guur xalaala ma ahee
Xukunkiis muxuu yahay?

Xaggee buu saldhigan kari
Nikaaxaan xadaynayn
Xaqa laysku leeyahay
Sida loo xanbaariyo
Xilka ruuxa qaadiyo
Xeerka qoyska lagu dhaqo
Dadku wada xusuustaan?
Guur xalaala maahee
Haddaan sino xunteed iyo
Xaaraan la qarinayn
Xukunkiis muxuu yahay
Xaggee buu saldhigan kari?

Nikaax xeeladeed oo
Xogtiisii la qariyoo
Xurmo waalid laga tagay
Xadkii diinta la inkiray
Xaalad uur markay timid
La inkiri xaqoo idil
Guur xalaala ma ahee
Haddaan sino xunteed iyo
Xaaraan la qarinayn
Xukunkiis muxuu yahay
Xaggee buu sal ku hayaa?

# 11. Hanka weyn

Rejadu waa albaabka nolosha, la'aanteeduna waa geeri. Way habboon tahay in uu qofku yeesho himma sare, waana laga wanaagsan yahay qofka hanka yar ee wax yar ku qancaya. Sidoo kale, waa laga fiican yahay ruuxu isagoo buurta korkeeda gaari kara in uu hoosteeda haabhaabto.

Qoraal la soo dhigay Facebook oo lagu tilmaamayey hanka sare ayaan aad ugu farxay, anigoo dardaaran yar u siiyay bulshadayda in ay horay u socdaan isla markaana aysan noqon kuwa ku qanacsan ama uu deeqo hanka yari. Waxaan war ugu xiray, fariidnimada ku raalli noqda:

Ruuxaan han weyn qabin
Ma hodmaayo abidkii
Horay u ma dhaqaaqee
Hagaasnimo ayaa sugi.

Hoggaan xumadu waa cudur
Iyo hoog aan kaa tagin
Dadka dunida kala haga
Hoggaan jeer u soo baxay
Yaa hadaf u yeeloo
Heerkay marayaan
Ku hanuunshay libin wacan.

Dadka dunida kala haga
Hoggaan baa u soo baxay
Haydaaro culus iyo
Harraad iyo dhib soo maray
U halgamay maslaxa guud
Habeen raaxo aan helin.

Waa hawl inoo taal
Himmo xumo ma tuurnaa?
Hareeraha ma qabannaa?
Ma hagnaa dalkeenniyo
Dadkeenna hagaaska ah?

Hee iyo jawaab celin
Inaan haa niraahdaa
Hawl culus ayay dhali
Iska hubi waxaad geli
Aan bilawno hawshoo
Haaneedka qabannoo
Dhinicii habboon iyo
Dhabta hoose siday tahay
Dhaqso hilinka nagu ridi
Himmaddeenna kor u dhigi
Oon hoos innoo celin.

# 12. Rejalaawe ha la degin

Tixdaani waxa ay si fudud uga hadlaysaa rejo xumada dhibaatadeeda iyo dadka jirradaas xun qaba in laga fogaado oo aan lala saaxiibin, maaddaama ay kugu daaran karaan cudurkooda oo kugu ridi karaan waddo qaldan:

Ruuxuu sharciga daayim hagaan
Hawli ka xumaaneHimilooyinkuu rabo wixii
Ka hor yimaadoo dhan
Ma quustee hab kaluu curshaa
Wuuna soo heliye.

Halgankaaga joogtee mar baad
heli dantaadiiye
Himmo sare dad aan qabin marnaba
hooy ha laba joogin
Hungow iyo dhib aan suulin bay
kugu habaayaane.

Iyagoo hagaag kula rabay
kuu horkici meel xun
Halgaadkoodu wuxuu kaaga iman
hilin nasteexeede
Oo dili waxaad haybin iyo
himiladaad goobi.

# 13. Yaa qaydka igu xiri?

Aadanaha baahi ka ma dhammaato, waxaase kala duwan magaca loo yaqaanno, sida loo arko, qaabka loo la dagaallamo iyo dhibaatada ka dhalata. Arrintaa waxaa keenay ummadaha kala duwan dhaqankooda, dhaqaalahooda iyo sida ay u arkaan nolosha guud.

Markaad dhab u eegto bulshadeenna milicsina aad ku samayso taariikhdii shalay misna aad barbardhigtaa sida maanta xaal uu yahay, waxaa kuu caddaanaya oo kuu soo baxaya in wax badani dumeen.

Maansadaani waxa ay cabbiraysaa dhaqanka foosha xun ee samaysmay, kaasoo noqday in ummado kale wax laga sugo. Natiijadaas oo keentay in dhibaatooyin badani soo gaaraan dalka, dhaqanka, dhaqaalaha iyo diinta, isla markaana ay talo gacanta ka baxday oo maanta cadowgeennii ina xukumayo innagoo raalli ku ah wax kastuu inoo ku taliyo.

*Yaa qaydka ii xiri?* dareenkaa ayaa biqilkeeda lahaa:

Waxaad qaban karaysood
Qayrkaa ka tuugtoo
In laguu qabtaa sugi
Adoon qayb ka noqonayn
Farna aadan qaadayn
Waxay noqon qiyaastaad
Ku soo qaban karaysaa
Ninkii qaylshay oo yiri
Waan is qaawinaayaa
Dharka qaadan maayee
Cawradayda yaa qarin
Oo qaydka ii xiri?

Waxaad qaban karaysood

Qayrkaa ka tuugtoo
In laguu qabtaa sugi
Ciddii qumman ma yeeshee
Waa qalad adkaadoon
Qabatiinnay waa hore
Caqligeenna qayb gubay
Oo ka qaaday garashada
Lagu qeexo talo idil!

Maskaxduuba quutoo
Awooddeeda qaatoo
Qolol badan ka degay oo
Qallooc iyo dhib joogtiyo
Quus aan dhammaan iyo
Shaqo aan la qaban buu
Qaanuunka uga dhigay
Dadku qaayibeen oo
Inta badanna qaateen.

Jid qalloocan kii mara
Qasadkiis ma gaaree
Waqti qaaliyuu dhumin
Qarfo iyo dhib buu mudan.

Qaran aan difaac helin
Hoos qaboow ma yeeshoo
Khayr laga ma quutoo
Qaab xumo ayaa dumin.

Shaqo quruxsan qoomkii
Isla qaadan waayaa
Qas ayay ku noolaan
Qaxna waa u daba yaal

Iyo geeri qaab daran!

Duulkaan is qaabayn
Ka heshiinnin qabkoodiiDagaallada qarriban dhalay
Qareen cadow la yimid baa
Dooddiisa qaadoo
Qaaddi iyo garsoor noqon
Qarankaagi maamuli
Amnigana u qaabayn

Dhaqaalana u qoondayn!

# 14. Tallaaba Kowaad

Waxa aan akhriyay sheekooyin qiima badan oo ku saabsan horumarka adduunka. Waxa aan layaabay oo aad ii soo jiitay sida hawl kastaa ama guul kastaa ay meel hoose oo dhib yar uga soo bilaabatay iyo isbeddelka weyn oo ay sammaysay! Markaas ayaan tiriyay maansadaani aan ugu wanqalay *Tallaabada Kowaad*, xilligaasna waxaan ku sugnaa magaalada Dooxa ee waddanka Qadar:

Hal tallaabo horuu qaad
Aad hadaf ka dhaliside
Ha aqbalin hagaasnimo
Aad horumar gaartide
Ha ka harin xawaaraha
Himilada aad tiigsani
Mar un baad haleeliye.

Hawl aan dhib loo marin
Hoos lagu ma seexdee
U adkayso holac iyo
Hanfigiyo dabaylaha
Harraad iyo dhibtiisiyo
Haydaarta aad mari
Habka nolosha ee wacan
Taasaa hagaysoo
Hilinkeeda kugu ridi.

Himma sare dad aan qabin
Horay u ma socdaanoo
Fowdaa horseed u ah
Hannaan madax ma yeeshaan
Habka dunida kala haga

Ma habayn karaayaan
Guul soo ma hooyaan
Hoogna way ku noolaan.

Iska hubi waxaad fali
Adoo maab ku hagayoo
Wadadduna hubaal tahay

Hawl culus markaad qaban
Ku hammootay wehelkii
Hubaal gacan ah fidin kara
Garabkana ku hayn kara
Iswayddii habkuu yahay
Adoon hoos u galin mool
Halistiisu badantahay
Wax yaa ku la habayn kara
Yaa kula halgami kara
Kula toosin hawshoo
Haaneedka sugi kara?

# 15. Jacayl baa wanaag dhala

Sababta imaanshaheenna dunidaan waxa ay ahayd Aabbo iyo Hooyo jacaylkooda oo mira dhalay. Guurkaas iyo arooskaas waxaa ka soo farcamay ubad isugu jira lab iyo dheddig.

Marka aad eegto waxyaalaha fiican ee aad qabatay ama aad hadda faraha ku la jirto, waxaa keena rabitaan iyo jacayl aad u hayso waxyaabahaasi.

Waxaa uu keenaa jacaylku xammaasad kordhisa waxqabad, adkaysi, dulqaad badan iyo in uu ceeb-laawe ka dhigo waxa qofku uu jecel yahay.

Tixdaani waxaa ay ka dhalatay muxaadaro aan ka jeediyay Göteborg, Sweden, sanadkii 2008, taasoo ku saabsanayd ababinta carruurta.

Muxaadaradaasi waxaa qiyaas ahaan joogay 300 oo qoys. Waxa aan wayddiiyay, ”imisa ayaa ninkeeda ku tiraahda ’waan ku jeclahay’, ayadoo carruurteeduna ay maqlayaan?” Saddex qof oo kali ah ayaa gacanta taagay. Kol hadday 300 oo qoys ay saddex ka mid ah jacaylka ay qabaan muujiyaan, bal sidee bay carruurteennu wax u jeclaanayaan?:

Jacayl baa wanaag dhala
Isagaa wadiiqiyo
Kuu furi waddada saxan
Wixii aad jeclaatana
Ka ma daashid waligaa
Waddadiisa waad hayn
Shaqadiisa waad wadi

Wax walboo dhibaata ah
Murug iyo walaac iyo
Walbahaar wadnaha dhiba

Oo wada musiiba ah
Waanada qalbiga iyo
Sabirkaa waxaa qarin
U habayn waddada saxan
Xal wanaagsan kugu hagi
Oo waara oon dhiman.

Waalidkii jacayl guri
Wadnihiisa uu dego
Wax kastoo mashaqo iyo
Wareer ihi markuu dhaco
Wuu is waansadaa oo
Miyirkii ma waayee
Wuxuu milicsadaa waa
Masuuliyaddaa waynee
Lagu waajib yeelee
Marna aan wareer iyo
Fudeyd looga weecdiyo
Waallida aqbali karin.

Miyir wuxuu u raadshaa
Wax kastoo xal keenoo
Wanaag sharaf leh soo celin.

Carruurtuna wanaaggay
Ku arkaan dad waaweyn
Yay ku waano qaataan
Noloshooda sii wadi
Ooy ku waari doonaan
Wixii ay arkeen iyo
Wadiiqihii la soo maray
Waa hore ayaa hagi.

Wax markay bartaan bay
Wanaag badan ku soo dari
Dadku ay wadaagaan
Bulshadood walaalayn
Waddankuna ku nabad gali.

# 16. Fanku wax buu cabbirayaa

23/05/2011, muxaadaro aan ka jeediyay Jaamacadda Al-Azhar ee dalka Masar ayaa la igu wayddiiyay fanka iyo waxa uu ka qabo Islaamku; ma xaaraan baa mise waa bannaan yahay? Fanku waa hibo la ina siiyay, waana kolba sidii loo adeegsadaa. Waxa uu la jaanqadaa dhaqanka, diinta, dhaqaalaha iyo aqoonta uu dal waliba leeyahay. Waxaa laga rabaa fannaanniintu in ay ilaaliyaan maslaxadda dadka, dadka iyo diinta, Taas ayaana qiime siin karta, bulshadu ay ku qaddarin, Ilaahayna uu raalli kaga noqon.

Hooyadii mu'miniinta, Caa'isha Abuubakar, Ilaahay ha ka raalli ahaadee, ayaa la wayddiiyay gabay muxuu yahay? Waxay tiri, "Gabaygu waa hadal, kiisa xunna waa uu xun yahay kiisa fiicanna waa uu fiican yahay":

Fanku foolxumaan iyo
Fasaad gaara maahee
Fahmigoo qalloocdiyo
Ficii midaan ahayn oo
Fiqi iyo Axkaam baran
Fatwo uu ka bixiyaa
Fanka midabxun siisoo
Foolxumaysay quruxdiis.

Faddaraynta faaftiyo
Fadeexiyo dhalleecada
Fanku maba mudnaynoo
Waa lagu fogaadee
Fahamkoo la saxay oo
Fiqi iyo Axkaantiyo
Laga fiirshay Diinteen
Ayaan kuu farfiiqiye

Faahfaahin iga maqal!

Farsamayn tix wadatoo
Farax iyo wanaag iyo
Farriin khayr leh sidatoon
Fidno iyo xummaan sidan
Fadeexiyo wax daran iyo
Faxshar dad u horseedayn
Fisqi calan u taagayn
Maxaa foolxumayn kara?

Falanqee middaasoo
Far waaweyn adoo qori
Fasir waxay dhib leedahay!

Fanku wuxuuba faafshaa

Fikir iyo aqoon iyo
Farriimaha bulshada oo
Fudayd la isu siiyiyo
Maaweelo iyo farax
Haddaan laga fogaan diin
Fasirkeedu saxan yahay
Caqliguna falgali karo.

Fanku wuxuu cabbirayaa
Wanaaggoo la fidiyiyo
Fikrad laysu geeyoo
Fariid iyo waxgarad iyo
Dad farsama le curiyeen
Falanqayn ku timidoo
Fudayd lagu tirtiri karin
Dunidana ku fidi kara.

Fanku wuxuu cabbirayaa
Wacyigoo la fidiyiyo
Farsamiyo war qiima leh
Fudayd loo gudbinayoon
Dalka furuq u keeneyn
Ku farxaayo maqalkuna.

Fanku wuxuu cabbirayaa
Filashada bulshada ee
Dadku ay ka faalloon
Fikirkooda horu wadi
Danta guudna faaqidi
Wax kastoon la filan karin
Maadays ku fidiyoo
Farsamana u dheer tahay.

Fanku wuxuu cabbirayaa
Markii uu fasaad jiro
Fidno gocosho dhiilliyo
Garashada fil weynee
Ka gadooda ficil-xumo
Yuu gaar u fiirshaa
Farta uu ku godayaa
Fasaadkeeda qeexaa
Fididdana ka celiya.

Fanku wuxuu la diriraa
Foolxumada badatee
Akhlaaqdii fogaysee
Fasaadkeedu caanbaxay
Filanwaaga noqotee
Fajac weyn abuurtee
Wixii fiican qarisee

Fadwadaa bal eegoo
Kana fiirso hadallada
Fanka lagu dhalleecayn!

Arrinta fool-hallowdeen
Ku fariisan xeradeed
Oo faanbis badan iyo
Hadal faaqidaad iyo
Fadhi badan u baahnaa
Farriintiisu culus tahay
Ayuu qaab fudayd oo
Farsamaysan kugu siin
Dadku kula fahmaayaan.

# 17. Yaad kaashanaysaa?

Awoodaha jira ee qiimaha ku yeeshay dunidaan sidaa ku ma soo dhalannin. Waa qaybo yaryar oo la uruurshay oo loo dhisay qaab ka duwan sidii ay ahaayeen.

Quwadda aadmiga waxaa qaro u yeela awoodo la isu geeyay oo isu tanaasushay, qaanuun wada samaystay, wixii raaci waaya jidkaasina waa hagaasaan.

Ruuxu waa uu joogi karaa isaga oo aan ka mid ahayn urur, haseyeeshee ma soo kordhinayo wax weyn, mar kastaana waxaa uu dareemayaa tabardarro iyo baahi. “Far keli ahi fool ma dhaqdo.”Diinteennu aad ayay u adkaysay iskaashiga, caqliguna sidaas ayuu sheegi. *Yaad*

*kaashanaysaa?* arrintaasi ayay ka hadlaysaa:

Kelinnimo ma fiicnee
Yaad kaashanaysaa?

Markaan eegno koonkiyo
Kumanyaal Ilaahay
Ku abuuray daafaha
Buuraha korkoodiyo
Kaymo iyo bannaannada
Kulli badaha oo idil

Waxa kooxo noolee
Kala kaan kuwada meel
Ka yeesheenba kayd guri
kulligood naflaydaa
koox koox waxaa baray
kasmo waxay ogaadeen
kelinnimo dhibkeedoo
is kaalmaysi buuxay

ku noolaansho doorteen
Keli keli xabaaleen.

Kelinnimo ma fiicnee
Yaad kaashanaysaa?

Yaa kula halgami kara
Oo kula shaqayn kara
Ood kuba kalsoon tahay
Keebaad ku aamini
Oo kaydka kuu hayn?

Kelinnimo ma fiicnee
Yaad kaashanaysaa
Kaa celin dhibaatada
Maatidana kula korin
Ood kalsooni siin kari?

Kelinnimo ma fiicnee
Yaad kaashanaysaa
Feker aragti kula qaba
Wehel fiican kuu noqon
Oon kaa fogaanayn
Markaad danaha guud fulin
Kula hayn culaysyadaan
Kalinnimo la qaban karin?

# 18. Magiciisu waa kee?

Midab aan xumaanayn marnaba
amaan minguuraynnin
Macaan malab leh abidkii mudnaan
iyo maqaam jooga
Wehel aan marnaba kaa libdhayn
maalin iyo fiidba
Musuqmaasuq aan lagu arkayn
kiis maldahan oo dhan
Miciin dhabana kuu noqonhayiyo
midaan daalaynnin
Mustashaarka kula jooga noqon
meella dan u aadin
Mugdiyo iftiin kala jeclayn
meel walbana jooga
Mana muuqdo abidkii marnaba
mana maqnaanaayo
Maansha Allaahuyee midkani
waa maqane joogaaye.

Masaariifna aan kaa dalbayn
iyo macaash toona
Khasnad maalka lagu kaydin noqon
meel sirta ilaalin
Macluumaadka uu kaa ogyahay
meella uma qaado.

Meeshii dhibaatiyo wax daran
laga malaynaayo
Mu’aamaro laguu degay dad badan
maalmo ka adeegay
Isagaa miciin ku ahoon

meella kaa jirine
Mardabiyo khayaaniyo ma galo
mawjado is dhaafi
Mukhlisnimo ayaa lagu yaqaan
aan marnaba leexan
Mustaqiim jidkiisuu ku socon
mana nifaaqeeyo.

Intaasoo macnaa yaa ka mida
wuxuu mutaystaaye
Maqaamkiisa ku ma koobi karo
maanso aan tiriyay
Malahaagu waa maxay haddaad
meel kastaba eegtay?

# 19. Faruxu saasuu ku iman

Saarkaani waxaa lagu magacaabaa *Faraxu saasuu ku imaan*:

Anoon ku fogaanahayn
Furqaan waa diin Alloo
Waxay fari waa wanaag.

Falkeenna dhammaan ayay
Fudaydka salkeenna iyo
Fasaad ka ilaalinoo
Waxay fari waa wanaag

Midkii khayr faafiyoo
Ku foofa cibaadadoo
Fasaad la dagaallamoo
Wuxuu faray Eebe gudan
Wuxuu fili waa wanaag.

Fadliga Eebaa lahoo
Na siiyay wax fiicanoo
Faa'iidiyo khayr ka dhalan
Waanaagoon fidinno yaa
Faraxa noo keeni kara
Firdawsa Allow na sii

# 20. Dumar baa barwaaqa ah

Hooyadii caaye cid kale ma nabad galin?

Aabbe carruur leh ayaa uu ahaa. Waxaa uu ka hadlaayey meel ay joogaan dad badan oo ka kooban rag iyo dumar.

Sidii uu u hadlayey ayaa uu hadalkii la taraaraxay oo waa uu isu bogay.

Ragannimada ayuu sharxaayey iyo qiimaha uu Ilaahay ragga siiyay. Waxaa uu yiri, “Raggu waxaa ay ka duwan yihiin makhluuqa kale, sida xoolaha iyo dumarka”! Waa uu sii waday, isaga oo leh, “ma wax naasihiisa caana ka yimaaddaan ayaa caqli leh”, qosolna waa uu ku sii daray!Waxaan is wayddiiyay, wiilasha ninkaasi dhalay sida ay hooyadood, walaalahood iyo dumarka ay la nool yihiin u arkayaan; gabdhaha ay guursan doonaan sida ay u la dhaqmi doonaan?

Wallee shaqo badan ayaa ina sugi, si loo toosiyo oo ragga soomaaliyeed intooda badan looga dhigo Binii’Aadam!

Waxaa ay ku saabsan tahay maansadaani qiimaha iyo mudnaanta ay dumarku leeyihiin iyo sida ay wax walbaa wanaag ugu beddeli karaan:

Dumarkaa na deeqoo
Doog iyo barwaaqa ah
Dalkeenana beddeli kara
Dabka gubi bakhtiin kara
Colaadaha ka damin kara
Derin nabad u fidin kara
Daah ubax leh xiri kara
Da’yartana wax bari kara.

Hadduu dumar daryeel iyo
Darajiyo mudnaan helo
La daaweeyo cudurrada

Darxumiyo mashaqo baday
Dowrkooda baabi'in
Daruur hoortay bay noqon
Dunidana barwaaqayn.

Haddii loo dadaaloo
Laga daayo dhaqammada
Dulmi lagu saleeyoo
Abuurkooda lagu dili
Nuxurkooda lagu dumin
Dadnimadooda baabi'in
Daruur hoortay bay noqon
Dunidana barwaaqayn.

Haddaan dumarka la xaqirin
Dhalashadooda laga didin
Dadku ay mashxaradaan
Oo loo dabdaaldago
Markay duni imaadaan
Ubadkuna dareemaan
Wuxuu dumarku mudanyahay
Daruur hoortay bay noqon
Dunidana barwaaqayn.

Haddaan daynno eexduu
Dumarkeennu qabatimay
Da'yarteenna lagu habo
Duqayduna ku sheekayn
Degdeg ubadku qaataan
Inay dumarku liidannin
Daruur hoortay bay noqon
Dunidana barwaaqayn.

Xafiisyada dushoodiyo
Seminaar dad kale wado
Iyo kaalmo dibadeed
Shuruuddeedu daba taal
Daawo noo ma noqonnine
Dumarkoo aqoontood
Dadaal weyn la galiyoo
La diyaarshay nolashood
Yaa dumin darxumadiyo
Diiftaan ku noolnahay
Xalkaad daydayaysana
Docda guriga yuu yaal
Dumarkaana fure u ah
Ha ka doonin meel kale.

# 21. Haddii aan wax qaban karo

Maansadani waxay ka dhalatay su'aal ka timid dhallinyaro ku noolayd Koonfur Afrika waqtigii ay socdeen Ciyaarihii Koobka Adduunka ee dalkaasi lagu qabtay 2011. Su'aashoodu waxaa ay ahayd, "Maxaad nagu la talinaysaa?"

Taladii aan siiyay dhallinyaradii waa tan:

Haddii aan wax qaban karo
Wanaag curin horseedoo
Wax beddelid la iman karo
Oon waano doorbido
Noo furi waddada saxan
Weedhaydu waxay tahay:

Dhallinyaro waxqabad iyo
Waqtigoo la dhawriyo
Ku mintida waxbarashada
Waddankeennu uu tebi
Weligiin ha daalina.

Wadiiqaha luggooyada
Inta waalan ee mara
Wehel yaysan kaa dhigan
Waddo soo xirmaysana
Waligiin ha qaadina.

Iyadaa ku weynayn
Wax khayrliyo samaan curin
Weligeed xumanayn
Wanaag oo dhan laga heli
Markay wadato taladaa
Wanaag iyo samaantuu

Waxyigii Ilaah faray
Dhaqan wacanna lagu hago.

Walaalihii is jeceloo
Waajibkooda qeexoo
Wanaag run ah mideeyaa
Danta guudna wada qaban
Waddo toosan fali kara
Waddankooda hagi kara.

Kooxdii wax baratoo
Go'aan mid ah wadaagtaa
Dalka wadi karaysoo
Waalliduu dabbaashiyo
Wareerkana ka bixin kara
Dhaxal waara uga tagi
Weligiis dhammaanayn.

# 22. Qaskii loo durbaan tumay

Sanadii 2010, Facebook ayaan ka helay warqad ay soo qortay gabar Soomaaliyeed oo la yiraahdo Sahra Ibraahim. Waxaan ku arkay boggeeda Facebook-ga geed weyn oo inta uu engegay laamihiisii daateen oo si qaab daran u soo dumay. Waxaa lagu qoray jirriddiisa ama guntiisa hadalkaan, "Qurac dumay sidiisii miyuu u dumay Qarankii!" Aad ayaan ula xanuunsaday oo meel culus ayaa uu iga taabtay hadalkeedii, waxaa uuna igu kiciyay xanuunno badan oo igu duugnaa. Musawirkaas ayuu ka dhashay gabaygan aan u bixiyay *Qaskii Loo Durbaan Tumay:*

Wax qummani qisuu leeyuhuu
ku qotonnaadaaye
Waxaa haga qawaaniin saroo
Qaaddir maamuliye
Markaan qaladno meeshaa talada
Qiimaheed dhimaye.

Qalloocii yaraan ruux ku gala
looma qiil helo e
Geedkii qallala maalin buu
qaab u soo dumi e
Qalbilaawe waa kii dunshaa
daar wuxuu qabaye.

Qoon sahan la'aan guurayoon
qaabka ka heshiisinnin
Qorshe loo dhan yahay aan ku gelin
geeddi qaxarkiisa
Degaan quri intay meeriyaan
qaybsan mahayaane.

Qiyaas li'i wixii lagu kacaa
qaab xun buu dhaliye
Qilaaf aan dhammaan wuxuu ka curan
waa qorshe la'aane
Qaadaadhig bay talo ku heli
qiimo dheeri ahe.

Qarankeennu waa kuu ahaa
tiir la qaayibay e
Goob qaniya uu waa ahaa
qaybsho kaalmada e
Wax ku filan ayuu qodan jiroo
dunida qaar gaadha.

Qabowgiyo ladnaantii la helay
roob aan kala qaadin
Iyo maal sidii daad qulquli
quruxna loo daayay
Qarkaa lagaga joogsaday wuxuu
Qaaddir noo fidiyay.

Qaskii loo durbaan tumay markuu
qaraxa weyn keenay
Qabiillada markii la isku diray
qorina loo dhiibay
Qayliyo durbaan aan wax tarin
la isku qiimeeyay
Oo talada qaybteeda sare
iyo qaararkeeda
Golayaashii lagu qaadan jiray
qalinba loo diiday
Qaadashada go'aannada la siin
qaar aan la aqoonnin

Oo quruxdii iyo qiimihii jeeshka
laga qaaday
Quwadduu lahaa ay duntuu
qoysas kala raacay
Yaa Qaranka wixii uu hantiyay
qaybna laga waayay

Oo boob qiyaas aan lahayn
la isu qaabeeyay
Qaybqayb ayaa loo la tegay
qalab wixii yaallay
Qasnadihii bunuugtana kuwaa
horay u sii qaatay!

Mindiyaha markii la isku qalay
uu qulqulay dhiiggu
Oo qaarba qaar cunay sidii
bahal qadoo oomay
Qudhac dumay la moodyoow miyuu
Qaranku duullaamay!

Miyaan quusannoo kala qaxnoon
meelna qaban weynnay
Ma qaxooti baan mudannay iyo
qaab aan la aqoonnin
Qaaradaha adduunyada miyaan
qayb u kala raacnay!

Qaab toosan baa dunida haga
iyo qawaaniine
Jidkiisoo la qaaday ku imaan
guul la qaayiba e
Cid walboo qilaaftaa middaa

qoomamay heliye
Qarfo aan jid marin bay
si fudud qalad u raacaane
Qalalaasihii may ku degin
rays qaboow badane.

Qoysqoys intii la isu dili
qaarna la xasuuqi
Khilaaf iyo danbiga aan dhammaan
lala qushuucaayo
Qawlkeennu uu yahay “anaa
qaar walba addoonsan”
Qaran dumay ma soo noqonayiyo
qaab xalaalnimo e.

Inta uu mid aan qalinba qaban
qaaddinimo haysto
Oo qawlka diintiyo sharciga
qalad ka sheegaayo
Dacwaddana markuu qaadi rabo
qaadan shilinkiisa
Qaran dumay ma soo noqonayiyo
qaab xalaalnimo e.

Qalbigoon la daaweynnin oon
qiiqa laga mayrin
Heshiis aan qabya ahayn midnimo
aan la wada qaadan
Qirashada danbiyadii la galay
oon lawada qeexin
Cafis qaadannaa iyo qisaas
lagu qorsheeyaaba
Qaran dumay ma soo noqonayiyo

qaab xalaalnimo e.

Quluub wada jirtaa lagu dhisaa
qiimo nololeede
Qayaanadii wax soo dumisay bay
qaar hiigsanayaane
Qarafaysi maal lagu helay
qaar hanbanayaane
Jidka qaranka loo mari maaha
kii qalloocsama e.

Qiyaas bay rabtaa aan mar kale
Qaab xun loo noqone
Qalinkoo godladay oo run uu
qaranku maalaaye
Wixii la isla qaataan marnaba
qoomamo arkayne
Isla qaadid bay mudantahaye
qaabka ka heshiiya.

Salaad aan qushuuc loo la iman
diintu qiri wayday
Dulmi qaaddigii fulinayaa
Qaaddir ma aamminine
Madax qaranki loo dhiibay dumin
waa qisiyiyo yaabe
Ilmihiisii oo qaday qayile
maxaad ku qiimaysay?

# 23. Yuu furuhu kaa lumin!

Sanadkii 2008-dii ayaan safar ku maray lix dal oo Yurub ka tirsan. Waxaan dareemay khatarta ay ku sugan yihiin qoysaska Soomaaliyeed, dagaalka dhex yaalla waalidka iyo carruurtooda iyo mid ka dhex socda ragga iyo dumarka, kuwaa oo ka dhashay laba aragtiyood ama laba dhaqan oo ay kala wataan. Arrintaas oo keentay dhibaato aad u weyn. Waxa aan ogaaday in aabbayaashu aysan weli la qabsan isbeddelka, hooyooyinkuna ay dareemeen xuquuq cusub in ay heleen.

Meeshaa waxaa ka baxay in ka mid ah dowrkii raggu buuxin jiray. Dhinaca kale, carruurta ayaa ku saamowday dhaqanka dhulka ay ku koreen, waalidkuna badanaa ma oga meeshay wax marayaan. Dagaal ayaa ka socda guryaha badankooda, kaa oo wax yeelay xiriirkii carruurta iyo waalidkooda. Dumarkii iyo raggii jawigaasi murugta leh ee aan arkay ayay tixdaani ka dhalatay

*Waalidow yuu furuhu kaa lumin*!

Haddaad udubdhexaad tahay
Abidkiis culays wada
Aqalkuna dushiis yahay
Ubadkoo la daaddihin
Inna aan ka daalayn

U iftiimin aayaha
Nolol lagu agaasimi
Awooddaada oo idil
Furaheeda ma og tahay
Albaabkeedu waa kee?

Awooddaada oo idil
Aasaaska koobaad

Jacayl baa abuuree
Furihiisa ma og tahay
Albaabkiisu waa kee?

Aasaaska koobaad
Nolasheenna oo idil
Istareexa lagu noqon
Aakhiro Jannada iyo
Wanaag aan idlaanayn
Uu Eebbe kugu siin
Ma og tahay albaabkiyo
Fure loo adeegsado?

Arrintaas idaylkeed
Waxay ka unkamaysaa
Abuurkeeda soo dhalin
Oksijiinta wada siin
Is afgaradka hooyiyo
Aabbaha dhex yaalloo
Anshax wacanna lagu dhaqo
Amarkii Rasuulkiyo
Akhlaaqdiyo wanaagguu
Islaamkeennu faray iyo
Ku salaysan iimaan.

Carruurtuna ogsoon tahay
Ama ay arkaayaan
In is aammin uu jiro
Aqalkoodu nabad yahay
Aabbo iyo hooyana
Sidii ul iyo diirkeed
Arrintoodu wada tahay.

Aflagaaddo iyo cay
Inaad sheegto ceebaha
Yay caado kuu noqon
Carruurtana ha maqashiin.

Inaan aqalku kaa dumin
Oon abuurku kaa bi`in
Nolashu aafo kaa galin
Ha illoobin hawshaas
Meel adagna ku ogow.

Haddii kale awood li'i
Irriddeeda yaan geli
Inkaar iyo wax daran iyo
Ubadkoo hagaasoon
Abidkood wax kuu tarin
Aqalkuna mud u yahay
Albaakooda yaad geli.

Waxaa intaas dheer
Murug aafo dhalisiyo
Ilmadood qubtaan iyo
Aaya-xumo ku waar bay
Nolashiinnu ku idlaan.

# 24. Dambidhaaf

Dambiyaal waxaan soo geliyo
dogob waxaan jiidhay
Waxaan Diinta taladeeda iyo
diiday amarkaaga
Dawgii habboonaa waxaan
dabamarkiis aaday
Oon duur qarfaa maroon
halista daaqaayay
Dacwadiyo xaqeedii waxaan
daa'im la afmeeray
Dalka waajibkiisii waxaan
daayacoon lumiyay
Waxbarashda dadweynaha
waxaan dowr ka gudan waayay
Maantaan dareen iyo rabaa
Daa'im tawbada e
Deeqdaadu adigay khalqigaa
deeqi idilkood e
Ducadaadu weynow aday
Daa'im haa tahay e
Kii dooni adigaan marnabadiiday odhanayn e
Cafiskiyo dulqaadkaagu waa
dunidan tiirkeed e
Dambidhaaf ILAAHOW i sii
darajo waa taa e
Iga moos shayaaddiin waxay
dooni waa halis e
Saa damacdo adigaan cid kale
diiday odhanayn e.

# 25. Cidi ma kuu sheegtay?

Odayaal cirro lahoo cilmiga
qaybo ka cantoobtay
Oo camallo shayddaan qabtoon
ceebna ka xishoonnin
Ooy beentu caado u tihiyo
camal la joogteeyo
Sida ay carruur saxa u korin
cidi ma kuu sheegtay?

Salaaddiin dadkoodii calmaday
calanna loo dhiibay
Qabiilkuna wuxuu cudud lahaa
ciidan iyo xoolo
Lagu caawiyoon maalin qudha
cidi warkiis diidin
Oo ceebta laaluush dhex galay
cidi ma kuu sheegtay?

Hummaag culimmo duulkaa wacdiga
caanka ku ahaaday
Cilmigaa Xaddiiskiyo Quraan
caalamka u sheegi
Waanada cirrooliyo carruur
soo celcelinaaya
Cibaadada jidkeediyo laqbayn
caasinnimo-diidka
Isaguna wuxuu camal falaa
ku cabbirrayn Diinta
Oon ka dhawrsanay camal ibliis
cunina xaaraanta
Caddaaladda markii laga hadlana

ceebi qabanaynnin
Danbiyada culayskaa lehee
Diinta ku ciyaari
Sida looga celiyaa kuwaas
cidi ma kuu sheegtay?

# 26. Hantaaq

Hadduu gabanka kii korin lahaa
gaajo u horseedi
Ka gambiyi wuxuu heli lahaa
goor iyo ayaanba
Gurmadkii cid kale siin lahayd
gooya jidadkiisa
Inta gaararkiisa ah dhammaan
ugu garaabayso
Dunidana garowshiyo ammaan
ay la garab joogto
Gargaar Eebbe mooyee inuu
geeri mudan doono
Oon gabanno noo soo kacayn
sow la garan maayo?

Gablan inaan ahaannoo ilmaha
geeri wada qaaddo
Waa aafo gaar nagu ah iyo
ceebo nagu gaaxday
Waa guri mugdi ahoon iftiin
geesna ka imaannin.

Garashada dulliga aan nahee
Gama'a noo diida
Na gaarsiisay gaajiyo colaad
goor iyo ayaanba
Qalbigoo gadooday ka iman
geesi taladiise
Markaasay go'aan naga rabtaa
garasho xeeldheer leh.

# 27. Ila dumi walaalow!

Waxay maansadanay tilmaan u tahay xaaladda taagan ee ku qotonta "adigu ma jirtide waxaan rabo yeel, oo raalli noqo cuntada ayaan kugu karsane":

Dadkoo nabad ku seexdiyo
Dalkoo dowlad runa hela
Deggan oo barwaaqa ah
Oo dunida qayb ka ah
Waan diiday aniguye
Ila dumi walaalow!

Dariiqyada rejada curin
Ee doodda noo furi
Dariskuna is kaalmayn
Dilkana naga yarayn kara
Dadku ay ku heli nabad
Waan diiday aniguye
Dabka igu la sii huri!

Waxaan dooni aan heli
Dantaydaa sidaa ahe
Ila doon kursiga qoys
Darajadan anaa mudan
Inta kale dantoodee
Ila dayday waxaan rabo.

# 28. Deeqsii mucaamalo

In kastood dadaashood
Bakhiilnimada diiddood
Maal doora bixisood
La timaaddo deeq weyn
Duunyadaada oo idil
Dadka ku ma fillaatee
Akhlaaqdood daryeeshiyo
Wajigaaga deeqsii.

U sii daa dareen wacan
Qosolkaaga deeqsii
Dardar geli waxyaabaha
Qalbigooda daawayn
Dadkoo idilna farax gelin
Daawayn dhibaatada
Daryeel weli aan loo helin
Digtoorrana ka quusteen.

Dagaallada adduunyada
Carrab dalab leh yaa shida
Oo dumiya nabaddii
Dadku wada jeclaayeen.

Ku dadaal bashaashnimo
Iyadaa wax deeqdoo
Dadka raalli gelin kartee
Ajirkuna u daa'imi
Dambidhaafna laga heli.

# 29. Maxay hooyo mudan tahay?

Hooyadu xusuus iyo
Xusid iyo qaddarin iyo
Xaqeedoo la dhawruu
Xaalkeedu mudan yahay.

Inta xoogga badan ee
Xarragoon dhammaantood
Iyadaa xambaartee
Ma xusuusanaayaan
Xanuun iyo dhibtay mari?

# 30. Dadnimoy maxaa tahay?

Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Dadku ay ku noolaan
Sidii roob da'aayoo
Durdur iyo barwaaqa ah
Duufaanna aan wadan.

Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Sidii aqal dugsoonoo
Darban oo dhammaystiran
Roobkiyo dabaylaha
Kuwa dega ka dhowroo
Ka ilaalin duulkii
Gudihiisa soo dega.

Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Kuu diidi xumahoo
Danta guudna kugu hagi
La dagaali eexdiyo
Dulmiyadan isbiirsaday
Daawayn dhibaatada
Dadka qaar sameeyaan.

Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Sidii roob da'aayoo
Durdur wabiya keenoo
Dadku ay ku noolaan
Barwaaqaduna daa'imi

Adigoon ka daalayn
Dadaalkaana sii wadi.

Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Inta dunida joogtaa
Sida dalagga noo baxa
Cimmilada dalkeenniyo
Duurjoogta oo idil
Aay kaa dareemaan
Mid danayn in aad tahay
Dantoodana ku hawlloon
Intaad dunidan joogtaa.

# 31. Wax baro

Da'da noo koraysiyo
Kuwa daa'im dhalashada
Dariiqeed ku soo jira
Si dantooda loo helo
Loo daboolo baahida
Dadka dhalan la iman kari
Waxay naga dugsanayaan
Hal-abuur wax daawayn
Duruufaha dalkeennana
Doc walbaba ka eegoo
Dadka wuxuu u sheegiyo
Duruustiisu ay tahay
Dadweynow dhammaantaa
Ku dadaal waxbarashada
Iyadaa danteenna ah
Waxaan doonno noo qaban
Dariiq toosan nagu ridi
Roob soo da'aayiyo
Daruur hoortay noo noqon
Deegaan barwaaqiyo
Degaan nabada nagu furi
Dulmigana difaac ka ah
Danta guudna cudud u ah
Cudurrada na dilayiyo
Daawayn hagaasnimo
Muddo dheer na daba tiil.

# 32. Ha danaysan kelidaa

Ha isku dayin inaad tahay
Mid danaysta kelidiis
Dantaadiyo dantaydiyo
Inta kale dantoodaa
Isku daaban abidkood
Hadday kala durkaan saban
Way wada dumaayaan.

Waa daliil ma doontee
Dib u eeg wixii dhacay
Markii danaha guud iyo
Dadku waxay wadaageen
Dadaal weynna soo galay
Isku duubni lagu helay
Qaar duluc u leexsaday
Meel daran la aadeen.

# 33. Aqoon baa hoggaan u ah

Sharaf idil dhammaanteed
Akhlaaq iyo wax garashaba
Aqoon baa hoggaan u ah.

ILAAH wuxuu abuuriyo
Aadmiga idaylkood
Aqoon baa hoggaan u ah.

Waxyiga Eebbe keenee
Islaamkeenna lagu hago
Aqoon baa hoggaan u ah.

Anbiyaduu Ilaahay
Uunkiis u soo diray
Inay khayr abuuraan
Samahana iftiinshaan
Akhlaaqdana horseedaan
Aafiyo shar iyo xumo
Iblayskiyo wuxuu wado
Irridahooda owdaan
Aqoon baa hoggaan u ah.

Oksijiinka nolosheen
Idaylkeen ku noolnahay
Aqoon baa hoggaan u ah.

Ummaddaan aqoon korin
Albaabbada cilmiga furin
Awooddooda oo idil
Aqoonkororsi aan gelin
Irridaha jahliga xirin

Ifka aan ku noolnahay
Asaaggood ma raacaan
Ma arkaan wanaaggiyo
Awood iyo dadnimo runa.

Waa laba albaaboo
Aadmiga la siiyee
Kee baad adigu geli
Ikhtiyaar ku door-bidi
Adigoon afduubnayn
Caqliguna idal yahay?

# 34. Sirta guurka

Subxaanow Ilaah baa
Sirta dunida kooboo
Si walbay u taallaba
Isagaa sarjarey oo
Waxba seegin abidkiis.

Sahwi ma le halmaan iyo
Hurdo iyo si tabar daran
Waxba ku ma sameeyoo
Subxaan wuxuu abuuraa
Wax saxoon khaldami karin.

Subxaanow Ilaah baa
Awooddiisu sare tahay
Sinjigeenna oo idil
Ka sameeyay Xaawiyo
Nabi Aadam sarartii

Dadkaan saaka aragnee
Milyaarrada sagaalka ah
Ku siqaaya tiradeed
Salkooday ahaayeen.

Inta saro la taagee
Lixda qaaradood simay
Hal qol bay ka seexdeen.

Siismada Ilaah iyo
Sabir ay wadaageen
Yaa saray u qaadoo
Salka nolosha laga dhigay

Magacoodu sara maray
Cidna aan saluugayn.

Sahradaan jeclaayeen
Saaxiib ahayneey
Adoo sabi carruuroo
Wax kastood samaysaba
Qosol aan ku sixi jiray
Maammana si qurux badan
Waxay kugu saluugtaba
ay ku sixi ciyaar badan
Sabankaasi waa tegay.

Mid kalaa ka soke maray
Oo sameeyay qaab kale
Sidaasina waxay tahay
Adoo sixi waxaan qoro
Oo toosin sadarrada
Sida aan u soo dhigay
Oo dooddu siman tahay
Si walbana u furan tahay
Ood gaadhay saban uu
Cumrigaygu igu simay.

Fadima-Sahray maqal!
Sidii hore dhammaatoo
Sawirkeedi wuu tegay
Sowdkaad maqlaysiyo
Sawirkaa ka muuqdaa
Fudayd ku ma salaysnee
Santarkii jacaylkee
Soo samaysmay waa hore
Yaa saaka laga tegay

Safar dheer ayaad geli
Waxaad naga sugtaa waa
Macasalaama sharaf badan
Laamaha sarreeyiyo
Salka geedka lagu qoray

Waxaad siin kalgacal aan
Sina naaqus u ahayn
Sayidkaad is raacdeen
Isagaa sad weyn iyo
Aad siin jacayl aan
Cidna loo la simi karin
Sabirna aad ku sii dari

Saddex iyo labaatani
Sabti juun ah weeyoo
Halkii aan sal dhigan jiray
Oon u la sinnaa maam
sowjkaaga yaa degay
Sabir iyo dulqaad sii
Sirtaadiyo sirtiisuna
Sina aan u kala bixin
Cid kalana la siin karin

Adoo sabi carruuraan
Sadarradan ku siiyoo
Saana waad ogsoon tahay

Tashi baa samaan iyo
Qoys lagu sameeyaa
Salka reerka dhidib u ah

Sacaadada la daa'imo

Sidee bay ku iman kari?
Haddii aanu sabir gudhin
Aqoon lagu saleeyoon
Sokeeyuhuna faragelin
Hawshiinna socodkeed
Sirtiinnana la falanqayn
Sina loo ogaan karin

Sowjka iyo sowjaddu
Jacayl aan sal guurayn
Samayntiis la joogtayn
Sabankoodu wada yahay
Siismada Allaa lehe
Hadduu sabi yimaaddana
Sidaas uu arkaayaa
Alluhuna sirtaa garan
Inay saafi tahay oon
Cidna aan sir kale wadan
Cibaadiyo samaantuna
Salka guriga ay tahay
Sujuud aan dhammaan iyo
Aqoon sare la daa'imi

Sidaan wax u arkaayaan
sadarradan ku sheegee
Sahraay iga goddoon taas
Meel kastoo saldhigatana
Sacaadiyo samaan iyo
Salaama iyo khayr mudo.

# 35. Waxaad qaban u soojeed

Goortaad wax qaban kari
Ama aadan qabanayn
Waa go'aan la qaatiyo
Qaraar ruuxu gaadhoo
Qasab ku ma yimaaddee
Waxaad qaban u soojeed
Ama quus ku noolow

Waxaad quus ka joogtoo
Qabashadiisa doonayn
Dadka kalana qaarkood
Ay qaban karaayaan
Qalbigaaga wayddii
Adoo qiri siduu rabo
Wuxuu qabanna soo sheeg!

Qaanuunka kugu haga
Qallooociyo dhib joogta ah
Xaggee qiilka laga dayay
Qiyaastiisa laga helay
Qorshihiisa yaa dhigay
U tusmeeyay qaab xumo
Noloshaada qayb ka ah?

Nin quudhsaday naftiisoo
Qiran waayay xooggii
Qaaddir noo hibooyiyo
Quwad iyo awood sare
Miyaa qoyska maamuli
Ka ilaalin qaab xumo
Ama qaranka kuu hagi

Qalloocana ka bixin kara?

Kii naftiisa qaybaa
Quruumaha wax tari kara
Qaladkana ka sixi kara
Qalin toosan noqo oo
Qoraalkiis wax daawayn
Cidna qalad ku raacayn
Qiimihiisa garan kara
Qaadan kara go'aan fula.

# 36. Dariiqa Dacwada

Shaqo daa'im aan socon
Duul rumaysan aan wadin
Dadaal run ah aan dhiibayn
Dar Ilaahna loo qaban
Doog xoolo naaxshiyo
Roob ka ma da'aayee
Ha ku dagan wax aan jirin

Diinteenna sharafta leh
Dacwaday faraysaa
Dulmi kooxi wadatiyo
Dana gaara maahoo
Qoys u ma danaysee
Dariiq loo jideeyoo
Ilaahay u doortiyo
Mabda' bay danaysaa
Eex iyo dulmina qabin
Danta guudna u halgami

Dadaalkuna xaq uu yahay
Dadka waajib ku ahoo
Difaaciisa laga rabo
Iyo fidinta diintoon
Dadka lagu qasbayn oo
Dadaal iyo farsamo wacan
Dariiqeedu uu yahay
Iyagoon dan gaar iyo
Darajiyo xil aan rabin
Maal aan ku doonayn
Dadka taa u qumayana
Waxay dooni ay garan.

# 37. Dhalan-rog

War maxaa is dabamaray
Quruxdii maxaa deday
Dusha qudhunka kaga raray
Iyadoon la diidayn

Oo doorshay midabkii
Daawashada mudnaan jiray
Oo diiday sharaftii
Maslaxadu ku daabnayd?

Dulmigiyo qalloocaa
Dalkii iyo dadkii rogay
Iyo dowlad xumadaa
Laga doortay tii kale

Oo loo durbaan tumi
Danbigii la soo galay
Lagu dumiyay qarankii
Dariskiina kala qaxay

Diintiyo akhlaaqdii
Daa'imkeennu uu faray
Dagaal weyn ku qaadnoo
La diidoo la daayacay

Isku duubnideenniyo
Dareenkii waddaninnimo
Xabaal durugsan lagu riday
Dusha miino laga dhigay

Iyo madax danteed tahay

Inay doollar lacageed
Laaluush ku doontaan
Kolba mooshin dabadii
Marna aan ka daalayn

Waa mahadho daa'ima
Iyo dabin la qooloo
Qarankeenna lagu dili

Waa ceeb dillaacdoo
Carruurteenna daba taal
Degdegna loo asturi karin

Waa dhacdooyin daran oo
Taariikhda lagu daray
Ribboodyana ku daabacan
Intarneedna lagu diray
Dad waliba arkaayaan

Xumaantaa is daba taal
Dadku qabatimeen oo
Distoor runa ah ka yeesheen
Duqayduna ku sheekayn
Da'yartuna ku dhaantayn
Daawo yaa u heli kara
Dariiq toosan fali kara
Daw qalloocday sixi kara
Dababkaa holcaayiyo
Fidnadeeda damin kara
Danta guudna fulin kara
Musuqmaasuq dayn kara
Caddaalana ku dayi kara
Oo loo duceeyaa.

## 38. Maxaa been ka daba timid!

Maxaa been ka daba timid
Yaad u la dan leedahay?

Waxaan u la dan leeyahay
Daalimmiin dhammaantood
Ku durduriyay xooggii
Darintiisa lagu tolay
Dalays hooyadii dilay
Caloosheedi dooxoo
Naaskii dillaacshoo
dib u cunay jirkeedii
Lafihiina duban raba
Dareen xumo la dhaantayn
Oo soohday dabinkii
Dareenlaawe luquntiis
Daldalaadda lagu sudhay

Maxaa been ka daba timid
Durbaankuu tumaayiyo
Dalkuu cadow ka iibshoo
Ku danaysi uu rabay.

# 39. Dariskaagu waa nolol

Daris aadan rari karin
Dantaadiyo dantiisuna
Daarahan dhexdoodiyo
Dayrkooda aay tahay
Nabad iyo dulqaad bay
Danahooda ku hirgelin

Dulmi iyo dhib joogta ah
Darxumiyo halaag dhala
Dadku kala qaxaayaan
Dulligiisa aragnee
Dagaal li'i ma doodnnaa
Da'yarteenni madhataye?

# 40. Dhaar iyo dhibteed

Dhaqammada siyaasigu
Muddo dheer ku caanbaxay
Wacad ka ma dhabeeyoo
Hawl ku ma dhaqaaqee
Waxay kaga dhammaataa
In uu dhaar ku maro been
Kuu dhuro dambiyo culus
Xumaan kaaga dhigo dhaxal
Dhirta aan ku noolnahay
Dhamaanteed gubaayoo
Dhanka kale sun soo dhigi
Dhulka wada abaarayn
Waxna aanan dhaafayn
Dhibtiisuna aanay suulayn

Anigoo dhallaanoo
Weli dhuuxin hadallada
Dhismihiyo ujeeddadu
Dhanka ay ka faalloon
Yaa dhaarta beentee
Siyaasigu ku dhiirraday
Dhegahaygu qaybeen
Dadkuna aysan dhihin weli
Iska dhaafa beentoo
Ku dhaqaaqa howlaha
Ka dhabeeya hadallada
Dadka aad u dhiibteen
Dhagahoodu qabatimay
Dhaar culusna lagu galay
Dhakafaaray aniguyee
Dheelallow miyaan ahay
Riyo dheer miyaan galay

Caqligii miyaa dhumay
Dhabtii nolosha maahee
Dhalanteed miyaa tani?

Macnaha dhaartu waa xugun
Waxa uu dhexyaallaa
Ka loo dhiibtay hawshiyo
Shacabkaa dhulkaa dega
Dhaartiisu waxay tahay
Inaan dhaqan caddaala ah
Ku maamuli dhammaantiin
Dhab ahaanna marag gelin
Ilaahii dhammaystiray
Kownka aan ku dhaqannahay

Dhayalsiga heshiiskiyo
Cahdi aan la dhowrayn
Dhib yaraanta lagu dumin
Maxaa dhaliyay qaabkaas
Ma Diintaan dhab ka ahayn
Mise waxaan dhannayn oo
Dhimirkiisu maqan yahay
Yaa dhaarta noo maray
Oon u dhiibnay hawl culus?

Dadweynahan la dhaawici
Lagu dhaarto magacood
Xaqoodii la dhaafsaday
Been aan dhammaanayn
Ka ma dhiidhiyaanoo
Dhibta ka ma danqanayaan
Dhabarkooda naafayn
Haddaan laga dhabaynayn
Maxaa dhaarta loo mari?

# 41. Afarrey ma reebbana

Mudane Maxamed Axmed Ilkacase ayaa Facebook-ga kaftan quruxsan iigu soo diray. Wuxuu yiri, "Dr. Cali, afarreyda miyaad isku daydaa adiguna?" Wuxuu igu dhaliyay in aan dib u eego arrintan oo ay ka horreeyeen su'aalo badan oo la iga weyddiiyey suugaanta waxaan ka qabo. Taasoo aad mooddid in dadka qaarkii ay diiddan yihiin. Suugaanta in loo adeegsado waanada, wacdiga iyo khayrka, waxaa yaab leh in dad u nisba sheegta aqoonta diinta ay si toos ah u diiddan yihiin qaybo ka mid ah suugaanta. Hadday arkaan sheekh qaadaaya shirib, hees, saar, dhaanto, geeraar, jiifto iyo wax la mid ah way ku ceebayn, sidii ruux meel ka dhacay. Sababta ma garanaayo, sida runta ah, maxaa yeelay diintuna waxii toosan way bannaysay oo ammaantay. Nebiga, nabad iyo naxariisi dushiisa ha ahaato e, ayaa amray saxaabadiisa in ay adeegsadaan gabayga kuna difaacaan diinta, dhaqankuna qiimaha ugu weyn ayuuba siiyay. Suugaantu waa hanti, qurux iyo awood Ilaahay siiyey ummadaha kala duwan. Saaxiib afarreydan adaa igu soo riday, waa hadiyad ee iga guddoon, inta kalena gaarsii oo ha ka la bakhiilin.

Afarrey ma reebbana
Haddaan edabta laga tegin
Oo laga ilaashaa
Aflagaaddo iyo cay
Uunkana wax loo dhimin
Islaamkana la daba marin

Afarrey ma reebbana
Waa aalad xoog badan
U adeegta khayrkiyo
Anshixiyo wanaaggoo

Aqoontana u kaalmeyn

Afarrey ma reebbana
Waa agab filweyn oo
Udgoonow Rasuulkii
Asxaabtiisi faray oo
Ku afuuf Xasaanow
Uunkii inkirayoo
Iimaanka diidoo
Afxumeeyay Nebigana
U adeegso maansada
In dacwada Islaameed
Ay gaarto uun badan

Afarrey ma reebbana
Waa dhaqan asiiloo
Haddii loo adeegsado
Eebbaheen siduu rabo
Ajir laga helaayoo
Ummaddana anficiyoo
Afkaarteeda korisoo
Afka hooyo u khidmayn
Ilkacasow walaalow
Aliflaydan maansee
Afarrey ma reebbana
Astaanteedu ay tahay

Adaa igu abuurtoo
Inaan tiriyo sababaye
Fatwadaydan aragoo
Afkaarteeda dhuuxoo
Inta gabay danaysiyo
Soomaali oo idil

Aqri oo bal gaarsii
Afarrey ma reebbana
Inta diiddan oo idil
Aqoon li'idu ay hagi
Afarreydaan gaarsii
Adigoon halmaamayn
Islaamkeen inuu qiray
Awooddeeda sharafta leh
Aayadaha qur'aankiyo
Axaaddiista Nebigaa
Arrinteeda sugay oo
Waxaa loo adeegsaday
Howlaha idaylkood
Ibnu'aadam loo diray

Afarrey ma reebbana
Ummaddeedanna gaarsii
Asal sharaf leh inay tahay
Afarrey ma reebbana
Ku aadaan intaad kari
Mar hadday anshaxa korin

Afarrey ma reebbana
Aroosyada dhacaayay
Alalaas mirqaan badan
Irriddiisa noqotaa

Afarrey ma reebbana
Ayay baa ku heestoo
Hooyaa abuurtoo
Ubadkay ku koriyaan
Ooy ku afbaraayaan
Ilmaheenna oo idil

Irrid caafimaad iyo
Jacayl ugu abuureen

Afarrey ma reebbana
Haddaad aragto suugaan
An aqoonsanayn sharaf
Oo aragxumaan fidin
Ama edeb la'aan qiri
Xishoodkuna agteed ool
Ama abees dadkii cunay
ku ammaani erayada
ka adeegsan baa xune
suugaan ha eedayn

Afarrey ma reebbana
Dhaqankii anbaday iyo
Afxumada bulshada ee
Arligeenna buuxday
In ka mida ka iman tani
Eedduna waxay kori
Aqoonyahan albaabkiis
Ka ilaalshay suugaan
Afxumeeyay oo yiri
In saroo wax baratiyo
Asluub culimo maahoo
Aaggeed ma degi karo
Afkayguna ma qaban karo

# 42. Sow ibtilo maaha?

Burburkii qaranku markuu toban jirsaday ayuu ahaa baaqii madaxweynaha dowladda Jabbuuti, mudane Ismaaciil Cumar Geelle, u fidiyay ummadda Soomaaliyeed. Waa baaquu shirkii Carta ka dhashay, kaas oo noqday mid loo bogay oo abuuray rejo aad u weyn.

Dhowr bilood ka dib ayaa waxaa isu kay qaban waayay shaqadii la sugaayay iyo habdhaqankii ka yimid maamulka cusub. Fajiciso ayay igu noqotay, Isla markaasna waxan xasuustay tabardarrada madaxdu in ay ka timid tarbiya xumada hadhaysay kuna habsatay carruurteenna oon u baxsanaynnin tarbiyadda guryaha taalla ama manhajka waxbarashada. Laan curdankii qalloocatay weynaan ku ma toosto. Dal walba madaxdiisu waxay ka ambaqaadayaan qaabkii yaraantooda loo soo koriyay, arrintaas ayaana keentay gabaygan, *Sow ibtilo maaha*?Arrin guud kuwii lagu ogaa

iyo ugaasaynta
kuwii hawsha lagu aamminee
xil iyo eed qaaday
Oo cadaw ka oodiyo la yiri
waardi ka ahaadaInay udubbadeedii dunshaan
sow ibtilo maahan?

Ammaanada kuwii qaadayee
dhaarna ku adkeeyay
Abbaan iyo ugaas iyo suldaan
odayna loo doortay
Agaasimidda howlaha dalkiyo
inay adeegaanba
Inay aafo sababteed noqdaan
sow ibtilo maaha?

Aqoon sare kuwii lagu tuhmiyo
garasho loo aayo
Anshax diin awoodaha cilmiyo
aayad iyo saynis
In ka mida itaalkii kasmada
qaybo ka idleeyay
Ummadduna is tiri way la iman
wax u adeegaaya
Ismadhaanto aragtiyo taliyo
abidba xaal keenin
Oo ka oodan irridaha wax qabad
sow ibtilo maaha?

Arsaaq iyo anfaco fiid la cuno
ama aroortiiba
Idaylkoodba awlaad gafiyo
ubad macluul haysoIlmo gaajo iishoo darxumo
alaladoo yuusay
U dheer yahay xanuun aan cid jirin
la ijtihaadaysa
Oo aabbihii dhalay qayili
sow ibtilo maaha?

Agloolkiyo ilaalada ilmaha
iyo agjooggooda
Haddaan hooyo iyo aabbo
noqon ul iyo diirkeeda
Ooy uba agaasimin tarbiyo
hab isku aad-aaddan
Ilma-korinta tooduba markaa
ma ambaqaadayso
Laba aragti mida aan lahayn
iyo akhlaaq toosan

Kuwaa ubad in ay wada korshaan
sow ibtilo maaha?

Eray lagu la qawlaba haddaan
iinta laga dhowrin
Anshax iyo haddaan edeb la barin
iyo asluub toosan
Oon lagu anqarin diin Ilaah
aragtideedoo dhan
Oon ubadka loo hagar baxayn
way ambanayaane
Iyagoon awood culus la gelin
ubadka soo biiri
anbaqaad in laga sii filaa
sow ibtilo maaha?

Addimadu waxay oofiyaan
uur wixii jira eAfka sheeg asaag iyo wehelin
ficil idlaynaya
U ma aha tusaaliyo astaan
ubad koraayaaye
Inay beeniyo waxaan jirin arkaan
sow ibtilo maaha?

Sida Eebbihii uumay faray
uunka dunidoo dhan
Ikhlaas waa inuu yahay waxaan
ku andacoonnaaye
Afka laga ma baafiyo waxaan
la la imaanaynnin
Ilma aan dadaal runa la gelin
edabna loo yeelin
Ku soo koray anshaxa aan lahayn

nuxur awood keena
Ummad iyo habkeed uusan maqal
iyo hannaan toosan
Halgamaa inaan kaba sugnaa
sow ibtilo maaha?

# 43. Alif ba'

Aqoon xumo waa argti la'aan waxayna ka timaaddaa markuu kor soo maro ruux aan haysannin shuruuddii marxaladda looga baahnaa. Sanadkii 1992 ayaan ku soo noqday dalka, anigoo ka maqnaa muddo 20 sano dhan. Waxaan aad u la yaabay aragtida dadku ay nolosha ka qabaan, siday isaga fadhiyaan, u murmaayaan isu laynayaan, una kala qaxayaan. Waxay ishaydu qabanaysay carruurteenna yaryari qaabxumada noloshooda, cayda, afxumada iyo dagaalka dhexdooda yaalla, kuwaa oo aan ku arkay magaalooyinka kala duwan. Waa baahan yihiin, waa qaawan yihiin, way cabsanayaan, u ma kallahaan waxbarasho oo dugsiyo furanba ma jiraan! Arrintaa waxay igu dhalisay dareen mas'uuliyad-darro la iska soo dhaxlay oo keentay sida aynnu nahay maanta. Waxaan helay in ka mid ah su'aashii ahayd; maxaa dalka dumiyay, maxayse dadku sidan u yihiin? Noloshooda may wax ka beddelaan?

Darxumada ilmaha dili
Ha ka doonin meel kale
Dadkii dhalay bal wayddii
Dulli soo jireeney
Isu wada dardaarmeen
Da' un bow dhaxaysee
Duqaydiyo carruurtood
Waa duul is dhalay oo
Dareen mid ah ayaa jira
Dalka wada maseeyoo
Dowrkooda baabi'in
Dambi ma leh carruurtiyo
Dawlad xumada taal iyo
Dadkii dhalay ayaa gabay

*        *        *

Ubadkeennu waa ubax dhashiyo
doog indho u roone
Ilwaad weeye laabtiyo u roon
oogadoo idil e
Waa arsaaq Ilaahay baxshoo
uunka wada siiyay
Waa ammaano culus oo la rabo
inaan adkaynnaaye
Innagunna mas'uul baan ka nahay
ababintoodaase
Edeb iyo aqoon wada jiraa
lagu aroorshaaye
Iyo ilaalo joogtoo marnaba
laga ilduufayne

Indha beele duulkii cilmiga
lagaba oodaaye
Agabkii awooddana ma helo
kaan iskool tagine
Aqoonba awoodaha dhashiyo
aayatiin wacane

Fikir wada abaabulan haddii
ubadka loo qeexo
Oo kaalintay nolol ka geli
kowda la agloolo
Oo waxay awood leeyihiin
laba ogaysiiyo
Aqalkana Qur'aankiyo dugsiga
laga iftiin siiyo
Oo loo adeegsado si wacan
agab tacliinoo dhan

Sidaasay ilmaha aan dhalnaa
ku aflaxaayanne
Ummadduna itaal ay ku heli
iyo awood weyne

Alif iyo ba'diisiyo ta'doon
aano lagu taagin
Aqoon kororsi daa'ima haddaan
ubadka loo sheegin
Oon oogta waabberi dhammaan
agabka loo qaadan
Oon lagu anqarin maalintuu
uur ka soo baxayo
Arrimaha Islaamkeennu faray
doodda lagu aadin
Oon lagu agaasimin cilmiga
Eebbaheen fidiyay
Oon ababintiisaba la barin
talo asluubaysan
Anshax sugan haddaan lagu hagayn
iyo akhlaaq toosan
Anbashiyo ihaaniyo habow
iyo afduub mooye
Miyuu ubadku naga dheefayaa
dhaxalgal aayood leh?

Iskuulladdu waxay bari
haddaan aragti loo yeelan
Manhajkana afayn iyo habayn
iinta laga dhowrin
Oon bare aqoon iyo karti leh
hawsha lagu aaddin
Ubadkaan dhaleynna ma helo

aayatiin wacane
Abidkii ma-kore yuu ahaan
meella ku ma aade

Adduunyada waxaa toosin kara
Aabbo iyo hooyo
Markuu ubaxu qaabkuu u kori
aragti loo yeesho
Anshax xumada oo idil haddaan
ubadka loo diidin
Irridaha danbigu uu ka iman
aayar laga moosin
Oon aqalka nabadda looga dhigin
iyo ardaagiisa
Oon aan nugayl lagu anqarin
aayar iyo waano
Ma arkaynno nolol aan ahayn
aafo iyo hooge

Arrin xumada qaarkeed ka daran
guri abaareede
Ummaddiis ma hago ruux hadduu
aragti waayaaye
Aqoon li'idu duulkay heshaa
ma ambaqaadaane
Iftiin ma leh, awood ma leh, ma ahan
aammin gurigiiye
Arxan ma leh anfaca loo xeshiyo
ilo barwaaqeede
Ilxumada ka timid xaaladdaa
weynnu aragnaaye
Adyad iyo xumaantii ka timid
waan ogsoonnahaye

Arligeenni waa kaa dumoon
waan ogsoonnahaye
Asqow oo dadkeennii wa kaa
oomman oo qadaye
Arkaantii jahliga oon la dumin
ma istareexaane

Ummadaha cilmigu uusan hagin
ma aflaxaayaan e
Abidkood ma gaaraan dadnimo
aayo iyo guule
Tartammada aduunyada ka jira
ku ma adkaadaane
Orod maaha hawshuye cilmaa
lagu iftiinshaaye
Orod maaha hawshuye caqlaa
lagu aloosaaye
Orod maaha hawshuye fal baa
lagu adkeeyaye

Dadkaan wada ordaayeen lahayn
aragti meel gaarta
Oo aag intay wada xirteen
gaajo la abaaday
Arrintooda oo idil ku xiray
Waxaan imaan doonin
Abidkoodna aan sahan u dirin
aradka loo guuri
Ku ag nool barwaaqada haddana
wada abaaraysan
Ilahaa biyaha ee qulquli
ku ma arooraane

Awood ma laha oo waxayna rabin
shaqo abuurkeede
Itaalkooda waxa saa ka dhigay
waa aqoon xumo e
Waa alif bilawgii ka dhumay
oonse la ogayne
Waa gole mid aan soo aflixin
soo abaabulaye
Waa ubad ninkii korin lahaa
iil u qodayaaye
Wax kastoo awoodsiin lahaa
laga ilaalshaaye.

# 44. Allow Sahal Amuuraha!

Geerarkani dhacdo gaar ah ku ma imaannin e wuxuu ka dhashay dhibaatooyin badan oo iga hor yimid intii aan ku soo noqday dalkayga oo dagaal sokeeye diirtay dooggiisii iyo dadkiisii iyo duunyadiisaba. Marar badan waxaan dareemi jiray dhibaatooyin xoog badan oo laga wadi waayay shaqooy-inka dalka ama khatar ku ah dadka shaqada waddaniga ah isu taagay. Markaas oo kale waa in aad miciinsataa Qaaddirka oo aad tuugtaa in uu kuu fududeeyo waxaad haysid shartana kaa xijaabo.

Ilaahii Aabi Aadan
Aabbo loo nasab sheegtiyo
Uurka hooyo adeegsan
Unkoo ciid ka abuuroo
Ku arsaaqay itaal iyo
Aqoon aan cidna haysan
Amminkuu wehel doonay
Ahaysiiyay Xawaa oo
Ka abuuray jirkiisa
Awood buuxda u siiyay
Inuu uunkani joogo
Milyaaraad ka abuuro
Adigaan ku baryaa oo
Wax kastaaba awoodee
Eebbihii i abuuroow
Igu toosi aqoontiyo
Shaqadood aqbashaa iyo
Igu aaddi wanaagoo
Abshirtaada i siiyeey

Ilaahii unuggayga

Awooddiis ku bilaaboo
Uurka hooyo dhexdiisa
Aqal aan ku nastaa iyo
Garoon aan ku ordaa iyo
Ilo aan ku dabbaashiyo
Oxsijiin aan dhammaan iyo
Arsaaq aan is dhimaynnin
Awooddiis igu siiyow
Igu aaddi wanaagoo
Abshirtaada i siiyeey

Ilaahii i abuuroo
Lafahayga adkeeyoo
Ku awdoo ku ilaalshay
Hilib aan la arkayn iyo
Harag ooga daboola
Ku adkeeyay jirkaygoow
Igu aaddi wanaagoo
Abshirtaada i siiyeey

Ilaahii i abuuree
Araggayga wanaajee
Maskax aad u shaqaysiyo
Albaab aan la marayniyo
Aqli ood uga yeeloo
Ku ilaalshay sirtaydow
Adigaan ku baryaayoon
Albaabkaaga istaagee
Igu aaddi wanaagoo
Abshirtaada i siiyeey

Arrimahayga dhammaantood
Mid uruursan ka yeelow

Irrid khayr leh ku toosiyoo
Waxa aafo dhacaysana
Afaafkayga ka moos oo
Arrintayda ka leexiyoo
Abshir khayr leh i siiyeey

Aakhiraa ma huraan ahe
Allow ii naxariiso
Igu aaddi wanaagoo
Abshirtaada i siiyeey

Subxaankii i abuuroow
Ha i seejin wanaagga
Arrimahayga dhammaanna
Shayddaan yuu kaa adeegine
Istiqaamo ka yeeloo
Irrid khayr igu toosi

Subxaankii i abuuroow
Ummaddayda dhammaanna
Arrinteeda wanaajiyoo
Ka ilaali hoggaan aan
U adeegin dantooda
Anna khayr igu toosi
Igu aaddi wanaagoo
Abshirtaada i sii.

# 45. Koris Wacan

Waxaan socday jid ku yaalla magaalada Muqdisho. Si lamafilaan ah waxaa iga soo hor baxay koox carruur ah oo cayaaraysa maalin dugsiyadu ay furan yihiin oo asaaggood waxbarashada ku hawllan yihiin! Waxaan is wayddiiyay, muxuu noqon doonaa ilmahan mustaqbalkoodu?

Ubaddkeenna sharafta leh
Haddii lagu agaasimo
Aqoon iyo wax garashiyo
Anshax iyo asluub sax ah
Ebyoon oo dhammaystiran
Markaasay awood iyo
Kobac aad u weyn heli
Iyagoo itaal qaba
U adeegi beledkoo
Aabbo iyo hooyana
Abaal marin sarraysiyo
Ixsaankooda joogtayn
U halgami dalkoodana

Ilmihii hannaankaa
Adag lagu barbaarshaa
Aflax bay ahaadaan
Abidkood ma hoogaan
Sharta ku ma arooraan

Ilmihii iftiin iyo
Aqoon lagu saleeyaa
Albaabbada wanaagguu
Ilaahay u wada furi
Ijaabadiyo khayr bay

Ku abbaari noloshoo
Aqbal Eebbe bay heli

Ubadkii iftiin iyo
Asluub iyo hannaan saxan
Aqoon lagu barbaarshaa
Akhlaaq loo bogaa iyo
Waxay yeelan edeb oo
Ambaqaadka noloshuna
Aayadaha Quraankiyo
Axaadiista Nebiguu
Aaddanaan ku socon oo
Iftiin haga ka dhigan oo
Asaxaabtii Nebigay
Akhlaadiyo dabiicada
U ekaan ku dayashoo
Markaasay awood iyo
Ubad hagaaga noqon kari
Eebbaa hanuunshoo
Abbidkood ma hoogaan
Sharafta kuma arooran

Ummadyahay dhammantiin
Indhihiinna wada fura
Awooddiinna oo idil
Ubadkiinna saaroo
Tarbiyadda adkeeyoo
U halgama carruurtoo
Ubixiinnu yuu dhadhin
Oo oonku yuu dilin
Abuurkiinnu yuu bi'in
Ooy inkaar innagu dhicin

# 46. Dugaag Deris Ma leeyahay?

Sannadkii 2010 dhexdiisii ayaa aniga iyo macallimiin Jaamacadda Muqdisho ka socdaa ka soo safarnay Boosaaso, ka dib mar aan halkaas ka soo gudannay shaqo jaamacaddu lahayd. Jidka dhinaciisa ayuu ka soo baxay wiil yar oo ul dheer sita. Markaan halkuu taagnaa u soo dhawaannay ayuu inta ushii uu sitay sida bunduq u qabsaday shiish na gu bilaabay, sidii nin dagaal ku jira oo dad laynaya. Aniguna markaan inanka niyaysan dilka arkay ayaan ka gabbaday oon baabuurkii isku dhex tuuray. "War ka gabbada rasaasta" ayaan ku iri macallimiintii aan la socday.

Inta ay ila yaabeen ayay qosalna ku dareen.

Waxaan ugu jawaabay:

Waa gu' iyo laba
intuu gabankani
gaari meel uu
wax gumaadee
ka gabbada hoy!
Xaaladdas ayay ku timid tixdani:
Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Kuu diidi xumahoo
Danta guud u gayllami
La dagaali dulankoo
Daawayn dhibaatada
Dadka qaar sameeyaan

Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Sidii mayay intuu da'ay
Durdur togagga buuxshiyo

Daleeduhu qulqulayaan
Duunyada dhammaan iyo
Dadku ay ku noolaan
Dalaggooda beertaan
Barwaaqadana daa'imi

Dadnimadu waxay tahay
Dareen iyo xilqaadnimo
Inta dunida joogtaa
Sida dalagga noo baxa
Cimilada dalkeenniyo
Duurjoogta oo idil
Ay kaa dareemaan
Mid danayn inaad tahay
Dantoodana ku hawlloon

Darsigani waxuu yahay
Mid diinteennu sheegtoo
Daliilkeeda lagu qiray
Hayeeshee dadkeennii
Duruuftuu ku nool yahay
Dabciguu la soo baxay
Waxay dumisay dowrkii
Dadka lagu aqoon jiray
Oo waxay ka doorteen
Dugaagnimo xil aan mudan

Dal fog baan ka imidoo
Dubkoodaa i hoday oo
Dad waxaan u haystaan
La soo degay anoon garan
Doorsoonka yimidee
Dugaaggeenni badiyee

Dadkii bahallo loo rogay!

Dugaaggaan aqoon jiray
Isagaa wax dili jiray
Difaacana midayn jiray
Isna wuu isdayn jiray
Dugaaggaan la noolahay
Wuu doorshay dhaqankii
Bahallada wax dili jiray
Dareen baahi oo qura
Ugaar ay ku doontaan

Dugaaggaan la noolahay
Ma daweeyo gaajee
Dilka yaa ujeedda ah
Inta dayrka ku la nool
Ama daaqi daafaha
Wuu dili dhammaantood
Isagoon u kala dayin
Kee hilib ku deeqsiin
Oo dabooli baahida

Dugaaggaa is cunaayee
Inta kalana diirtee
Wax kale aan danaynayn
Dulmigiisa joogteen
Miyaan weli dugsanayaa
Derisnimo ka dhawraa?

Isagaa is wada dilay
Kala diday intuu yahay
Dibadaha u kala qaxay
Oo duulba duul kale

Dabinnada u qooloo
Dhib yaraan ku daateen
Damaashaad intuu dhigay
Durbaan iyo ciyaar tumay
Ku digleeyay maydkii

Dabkii buu dhakhso u shiday
Hilibkoodii buu dubay
Cashadoo diyaaruu
Dulmeer wuxuu ku soo maray
Duunyaday lahaayeen
Beerahay diyaarsheen
Waxay daaro taageen
Farxad buu la duuloo
Daawasho ayuu galay
Kolba gees ayuu dayay

Isagoo dammaashaad
Durbaankiisa tumiyoo
Dareenkiisu guul yahay
Dabin uu mar hore dhigay
Dadka uu ku layn jiray
Dulmi waa musiibee
Yay luquntu dalaq tiri

Waxba ka ma dambayn oo
Baahi buu dareemoo
Mowd baa ku soo degay
Hareeraha markuu dayay
Dadkiisii ma aragoo
Dugaagguu la noolaa
Deriskooda door biday
Durba waxay ogaadeen

Duruuftiisu siday tahay

Dagaal baa dhex marayoo
Anaa diiran hilibkiis
Isku dile anaa cuni
Doodduu dhegaystoo
Waxuu yiri dugaagow
Anigaa is dilay oo
Dadkaygiina madhiyoo
Dugaagnimo ka doortoo
Deris been ah qaatoo
Cidla dayr ka ootoo
Naftaydii ku daayacay

Dabinnadaan aloosee
Dadkaygii ku madhiyaa
Mid ka mida an dalaq iri
Idinkuna dugaagyahaw
Haysku dilina hilibkee
Dhib yaraan ku daaqoo
Daamankiinna buuxsada

Dadkii aan ahaan jiray
Dugaagnimada ka hor baan
Farriimahaan u dirayaa
Dugaagow warkaas qaad
Danbigayga waan qiran
Inta iga dambaysaay
Ha ku dayan waxaan falay
Gacalkana ha daayicin
Dariiqaygu waa halis!

Ninkii dilay walaalkiis

Isna ka ma dambeeyoo
Darxumuu u dhiman oo
Wuu daba galaayaa
Duunyadan dhammaanteed
Midna dheefsan maayoo
Dugaag baa dhaxlaayoo
Ku diglayn barwaaqada
Iyo maadhkan soo di'i

Dadkii aan halaageen
Aakhiro u dirayoow
Dugaag deris ma leeyahay?

Dadkii waxay yiraahdeen
Doorashada markay tahay
Dugaag deris ma yeeshaan
Dantu haddayna kugu tolin
Duruus badan markaan maray
Dib u eegay waxa dhacay
Dalkaygii kuwii gubay
Dadkaygii kuwii cunay
Duunyadoodii kala diray
Dalaggoodii wada gubay
Iyagii is wada dilay
Dantu waa balaayee
Kuwaasan dugsanayaa
Oon deyr wadaagnaa
Damacaygu wuxuu yahay
Sabir iyo dulqaad iyo
Cilmi daawo dhala keen
Dadaalkaaga labalaab
Ha ka daalin weligaa
Asalkii la doorshiyo

Dadnimada ku soo celi
Akhyaar ku la dadaashiyo
Kaalmayso ducadoo
U dir Khaaliqaagii
Durba wuu ajiibiye

Daa'imoow Ilaahow
Naga qaad dulliga iyo
Daalimmiin isbiirsaday
Duulkaa nasakhan ee
Dadnimada ka guuree
Dugaag halisa laga dhigay
Dadnimadii u soo celi
Dalka nabad haraysiyo
Dowlad sharaf leh noo keen
Xornimada afduubayn.

# 47. Ummadaha Maxaa Haga?

Anigoo soo arkay dood ku saabsan sidii loo horumarin lahaa hannaanka loo gudbiyo casharradda cusub loona toosin lahaa oo loo tayayn lahaa waxbarashada sare ayaan dhegaystay dad Soomaali ah oo ka murmaya siday u qabsan lahaayeen manaasibta dawladda iyo reer walba intuu heli lahaa. Waxaa yaab lahaa in aan marna la is dhihin yaa mudan oo karti u leh manaasibta lagu dagaallamaayo oo keentay muran badan. *Ummadaha maxaa haga*? dareenkaa ayaa igu abuuray:

Libin-doon adduunyada
Waxa oratan yaalliyo
Tartannada awooddoo
La abaabuloo badan
Inta kuba adkaata
Asalkooda yaa haga?
Badankeed adduunyada
Aqoontaa asaas u ah

Ummaddaan cilmigu hagin
Awooddeedu waa been
Itaalkeedu waa dhicis
Masuul eber ah iyo nacas
U qalmaynin taladay
Ka yeelani ugaas oo
Markaasay inkaar dhici
Iyo aafo qaab daran
Arrintuna is daba mari

Ilmahaan iskoolkiyo
Ababsiin dugsiga tegin
Oo aan tacliin baran

Ebedkiis ma tabar galo
Ummaddana wax u ma taro

Intaa ku ma ekaadee
Mar hadduu aqoon qabin
Aalaa waxaa dhici
Qofku inuu ahadaa
Adyad iyo xasar-wade
Arrin xumo idaylkeed
Dhibta lagu abaabulo

U adeeg waxbarashada
Aqoon laga ma maarmoo
Waa asaaska noloshiyo
Albaabkeeda sharaftiyo
Irridaha karaamee
Aan ogaanno taladaa
Isu gaynno tabarteen
Si aan ubad u beerraan
Hoggaan adag u noqon kara
Hagi kara dadkiisana.

# 48. Rejaa Nolol Leh

Waxay ka timid tixdani sheeko dhex martay aqoonyahannada Soomaaliyeed qaar ka mid ah oo ay ka muuqdeen quus iyo rejo li'i. Waxay dadaal weyn ku bixinaayeen inta la joogta inay ka raaridaan in aan waxba laga beddeli karin sida ay wax yihiin.

Waxaan u qaatay col nagu soo duulay oo markuu in badan difaacii ummadda cagta soo mariyay hadda raba inuu dhaawactiro inta yar ee aan weli is dhiibin difaacana ku jirta.

Maansadaan sidaa ayay ku timid:
Rejadu waa iftiin iyo
llays u leh ahmiyad weyn
Adduunyada in joogtoo
Aadmigu ka kow yahay

Nimankii agaasimay
Xuriyadda irmaankooy
Ummaddeennu mashaa
Dhallinyarey ahaayeen
Fikiroo is aamminay

Reja adag lahaayoo
Orday oo dhaqaaqoo
Waajibkooda oogoo
Aloosoo agaasimay
U adeegga shacabkiyo
Ebyoon dawlad kaamila

Kuwaa doorshay dhaqankii
Ku dahaadhmay nacabkiyo
Hoggaan daalimmiin iyo

Cadow la iska daba galo
Dad waxay ahaayeen
Go'aan daacadnimo wada
Halgan dhaba diyaar u ah
Marna aan ka daalayn
Daawaynta cudurrada
Dadku aay la liicaan

Kuwa diiday noxurkii
Dalka nolosha u ahaa
In dib loo dhaqaaqana
Durbaannada u tumayaa
Kolla daacad maahee
Waxay dooni yaa garan?

# 49. Aamiin inoo Dhaha!

Bartamaha sanadkii 2011 ayay abaar culisi ku habsatay dalka Soomaaliya badankiisa. Dhimasho aad u weyn ayay gaysatay iyo barakac saameeyay gobbollada koonfureed badankooda, taasoo keentay boqollaal kun inay ka tallaabeen xuduudka dalka. Maansadaan waxay ku timid dhacdadaas:

Ilaahayow awood lehe
Noo sahal ammuuraha
Dhibta aayar naga qaad
Ololaha colaaddiyo
Abaaruhu ha suuleen
Naxariis idaylkeed
arligeen ha laga helo

Dambiyada aruure
Aafadu ka dhalatee
Dhulkeennii idaylkiis
Awooddiisi gaasiray
Ummaddeenna kala dilay
Ilma nabad ku waayeen
Iyo odayo tabar dhiga
Ammaan dumar ka quusteen
Adigaa awood lehe
Irriddeeda naga laab

Casiisoow Ilaahow
Kii adduunka taagee
Dadka wada abuuroow
Adigaa awood lehe
Ibtilada na haysiyo
Imtixaanka naga fayd

Casiisow Ilaahaw
Awood madax leh noo keen
Oon aadin boob iyo
Eex iyo dan gaariyo
Dulmi lagu adeegtiyo
Shacab dantiis an moogayn
Iyo dawlad caaddil ah
Inta maqasha ducaday
Ha aqbalo Ilaahee
Aamiin inoo dhaha.

# 50. Hoggaan Toosan

Tixdan waxay ku timid su'aal wiil Soomaaliyeed oo qurbajoog ah i wayddiiyay. Wuxuu yiri, "sidee loo heli karaa hoggaan toosan?"

Hoggaan caafimaad qaba
Cidna kuu ma haysee
Cilmi iyo dadaal iyo
Caqligaaga kaashoo
Carruurahana gaarsii

Inta cudud koraysoo
Waxii loo cabbiri qaban
Dadaal culus ku dhiiboo
Ku celceli waxaad bari
Madax caafimaad iyo
Ciidan ka ma sokeeyee
Carbintooda joogtee

Shacbi aan cidna xukumin
Hoggaan caafimad qaba
Aan calafsan waligii
Caddaalana barteed arag
Ciyaar ku ma hagaayee
Ha ka daalin camalkaas.

# 51. Dood-wadaag

Maansadaani waxaa ay ka tarjumaysaa dood dhex martay dhallinyarada Soomaaliyeed iyo dhulkoodii hooyo. Waxay ka hadlaysaa waajibaad laga seexday ama ulakac loo dayacay.

Waxa ay sidoo kale caddaynaysaa qaabka ama hannaanka looga bixi karo dhibaatooyinka, gaar ahaan marka ay dhallinyaradu adeegsadaan xooggooda u na guntadaan difaaca qaranka.

Maansadaani waxa ay tusale wanaagsan u tahay dhallinyarada Soomaaliyeed, waana maanso tusaalayn u ah habka lagu horumarin karo dhulkeenna hooyo.

Marka laga hadlayo afmaldaha, maansadaani waa qofayn; wax aan qof ahayn in aad u la dhaqantaa sidii isagoo qof ah. Dhulka ayaa waxaa loo la hadlayaa sidii inuu qof yahay.

*Hordhac*

Qaybtaan hore waa hordhaca ama daahfurka maansada. Waxa ay tilmaan ka bixinaysaa maansada iyo habdhaceeda dambe iyo cidda ay dooddu u dhexayso.

Dhallin iyo dhulkeedii
Waa dood dhex taalloo
Dhibta taalla falanqeyn
Dhaliilaha tusaalayn
Dhanka looga bixi karo
Ama lagu dhammayn karo
Yay dhiirrigalin oo
Indho runa ku dhowrtaa
Noo soo dhawaysaa

Dadweynow dhammaantiin

Ha la dhuuxo erayada
Dhabta nolosha hilin u ah
Oo yaysan kaa dhumin
Dhib-yaraanna kugu marin
Dhabta inaad abbaartaan
Waa dhumucda xooggiyo
Hanti aan dhammaanayn
Dhaqan saxana kugu hagi
Dhibtana qayb yarayn kari

Waxay taasi dhaqan geli
Dhoohanaanta laga bixi
Dhallin tiirar noqotoo
Dhulka madax ka noqon kari
Dhiirran oon cabsoonayn
Cilmi dhabihi uu hagi
Ka dhiidhiyi xumaantiyo
Dhaawaca xanuunka leh
Dhiiggeenna qubayoo
Dhimashada horseed u ah

Qaybta kowaad - farriin cabasho:
Haddaan ahay dhulkiinniyo
Dhabta hooyo oo runa
La'aantiis la wada dhiman
Dhallinyaro war ma ogey
Wixii dhacay ma maqasheen?

Dhibaatadu markay timid
Dhawaaq been ah uu baxay
Dhagihiinna lagu shubay
Waxaan khayr ka dhalanayn
Dhumuc weyne geedkii

Hoos qabow ka dhalan jiray
Dhamac naara lagu shiday
Dadku kala dhaqaaqeen
dhawaaqaagu i ma solin
dheeftaada maan helin
dhulkaagii inaan ahay
Oksijiinka kuu dhalin
Dhallinyaro ha moogaan

Weedhu yay ku dhaafine
Ha furaysan dhagahoo
Dhab u qaado oo maqal
Kuna dhaqan warkaygaas
Oo yuu ku dhinac marin.

Qaybta labaad – ka garaabid cabasho:
Dhulkii aan jeclaayow
Dhallintaadi baan nahay
Dhaacaanka naaskiyo
Dhiiggaagi baan jaqay
Caanahaagi baan dhamay
Calooshaan dhex jiifoo
Dhammaan waxaan u baahnaa
Adigaa dhamaystiray
Dhibyaraanna igu habay
Dhalashada horteedaba

Dhulkaygoow war iga maqal
Hordhac waan dhammeeyee
Dhallinyaro warkeediyo
Dhambaalkeed wuxu yahay:
Wax badan buu i dhinac maray
Dhawaaqaaga diidoon

Dhagaha kaa furaystoo
Dhaawacaaga culus iyo
Dhulgariirka xoogga le
Dheeldheel u qaatoon
Dhayalsaday farriimaha
Dhinacaaga ka imaan

Ha yeeshee wixii dhacay
Dhakhso yuu i taabtoo
Dhaawacay naftaydoo
Qalbiguu u dhaadhacay
Dhiigga xididdadiisiyo
Sanbabbada dhammaantood
Yuu sii dhix marayoo
Dhanqaryana u gaystaa

Dhulkaygoow war iga maqal

Waan soo dhakhsanayaa
Markaasaan dhaawacaagiyo
Boogahaaga wada dhayi
Dhaqan xumada taallana
Dhakhso yaan beddelayaa
Nabad la isku dhaarsado
Yaa loo dhaqaaqoo
Wax kastoo ku dhibi jiray
Dhibtaadana ka qayb galay
Yuu ku dhibin wixii tagay
Way dhammaatay taladood

Dhulkaygoow war iga maqal
Dhallintaada xoogga leh
Go'aan dhaba ayay fulin

Dhakhso yuu ku meel mariIi dhiib kalsoonidaWaxaan
dhigo warkiis maqal
Wixii kala dhantaalmee
Kala dhumay anaa jirin
Dhabba toosan wada marin
Haddaan iilka lay dhigin

Qaybta sadexaadaad - dhanbaalkiinnu i ma solin!
Dhallinyaro warkaagiyo
Dhanbaalkaagi waan helay
Dhawaaqaaga sharaftiyo
Dhisma nolol ka sheekayn
Dhegtu way u muhatee
Ma dhab baa ma dheel baa
Dhamac hoos ka shidanoo
Dambas lagu dhex qariyoo
Dhexdiisuna wax kale tahay
Dhabbaheeda lagu guban
Ama dabin la dhigay iyo
Suryo dhagar armay tahay
Cidna nabad ku dhaafayn
Geerina dhabteeda ah

Dhallinyaro war iga maqal!

Dhaawacaygu waa halis
Weli maanan dhimanoo
Rejo nolosha ka ma dhigin
Isma dhiibin haatane
Sheekada ha dheerayn
Haygu dhibin warkaagee
Dhallinyaro run ii sheeg!

Dhawaaq beena i ma hodo
Dhunkaal daawo laga waa
Dhalanteed run noqon waa
Ma la dhuuxay taladaas?
Dhinacyada ma loo rogay?
Dhabteedii ma loo tagay?
Waxaan dhicin armay tahay
Dhaqan saxa ka soo fulin
Nin mirqaansan dhaliyoo
Mafrash doodda lagu dhigay
Loo tegin dhabteedii
Moolkeedi loo dhicin?

Dhallinyaro waxaad tiri:
Waan soo dhakhsanayaa
Markaasaan ku dhaawin
Boogahaga wada dhayi
Dhanbaal kaaga ii yimid
Dhab miyaan u qaataa
Iyo hawl dhammaystiran
Dhallinyaro wax iga hubi
Dhib ha ii hadoodilin!

Qaybta afraad - ha degdegine ii sabir:
Dhulkaygow wax baa siya
Sirtaydii dhammaanteed
Kuu dhiibay aniguye
Kalsoonida ha iga dhumin

Ballan dhaba ayaan galay
Dhexda yaan ku soo jiray
Markaan helay dhanbaalkane

Isma dhigannin maalmee
Gunti dhuuqsi baan galay
Adiguna dhib joogtiyo
Eed aan dhammaan baad
Wali igu dhibaysaa

Kumannaan dhallin ahoo
Dhulka gaararkiisiyo
Dunidaas ku dhaqanoo
Kuu dhaartay baa jira
Dhibta kula dareemoo
Dhiirran oon cabsiba qabin
Maxaa dhibay naftaadoo
Dhallintaada uga didi
Dhammaan jidadka uga xiri
Uga dhigi dad aan jirin
Nuxur dhababa aan qabin
Ballantoodu dhaqan galin?

Dhulkaygow macaanow
dhallintii wareertaye
Sidee baan u dhaqannaa
Dhulka ugu adeegnaa
Calaaqada dhexdeenna ah
Dhidibbada u aasnaa
Shakina looga dhowraa?

Qaybta shanaad - dhallin lagu hongoobay!
Erayadaan ku dhihi iyo
Dhabtu yaysan kaa nixin
Dhawaaqaagu adiguu
Meel dheer ka yimidoo

Intaad dhaarataa tiri
"Waan soo dhakhsanayaa"
Welise taasi may dhicin!
Howl aadan dhab u hubin
Maabkeed laguu dhigin
Safar dheer adoo gali
Saadkaaga meel dhigan
Dhabbahaad maraysiyo
Dhulka sahan ku kala bixin
Adigoon xogteed dhugan
Oon kala dhigdhigin wali
Yaad ii dhawaaqdoon
Kuu dhaga nuglaadoon
Run u qaatay dhaartii
Wixii dhacayna waad garan!
Dhallin lagu hungoobaay
Maxaad igu dhalliishaa
Garta aan dhagaystee?

Waxa aan la dhaygagay
Dhimirkuna u maqanyahay
Dhafoorrada la haystaa
Dhan walbaba la seega
Markaan dhowro saa tahay
Arko dhaashigaagiyo
Dhaqankaaga ceebta ah
Dharka iyo xarragadiyo
Dhaanto tumashadaadiyo
Dhoolla wada caddayntiyo
Qosol aan dhammaanayn
Ayaa yaabkan igu dhigay
Oon kugu dhaliilaa
Oo dhumiyay sharaftiyo

Jacaylkii dhabta ahaa
Waayo noo dhaxayn jiray

Dhanka aan ka eegaba
Hawshaadan kala dhimman
Kalsoonina dhibteeda ah
Dhabta laga ma maarmee
Dhallin lagu hungoobaay
Gurmad dhaba ma gali kari
Dhiillada ma daawayn
Boogaha ma iga dhayi
Dhallaankiyo in tabar daran
Dhakhso ma ugu kaalmayn
Dhan walbaba ha seegine
Dhiigjoojin ma u fidin?

Qaybta lixaad – I la arag wixii dhacay:

Xoolihii aan dhaqan jiray
Badda dheerarkeediyo
Dhulka wada sabbayn jiray
Wax yar baa ka sii dhaqan

Dhirtii aan lahaan jiray
Ku dhaqnayd ugaadhiyo
Shinbirahoo dhar loo xiray
Waa la dhoofsadaa oo
Dhammaan waa la gurubsaday
La dhaafsaday wax aan jirin
Dhallinyaro ma aammini
Ma rumayn dhabtaa culus?

Hadday talo dhab kaa tahay

Erayadan dhegaysoo
Soo dhammaystir hawlaha
Dhulka aad ku daafici
Una dhabar-adayg taas

Qawaaniintu say dhigi
Dhismo aan waxbarashiyo
Fikir lagu qotomin dheer
Xoog dheellitiran oo
Dhinac kaliya loo wado
Tashiguna dhexyaal iyo
Tiirdhaxaad u wada yahay
Hawshiisu kala dhimman
Ma dhammaysna shaqadiis
Dhakhsana wuu u dumayaa

Haddaad mooddo guri dhaba
Dhismihiisu saxanyahay
Adigoo dhex jooguu
Dhib yaraan ku soo dumi
Wixii dhicina waad garan!

Waxaan loo dhammaystirin
Dhabta baahiduu qabo
Guul kuu ma dhalayee
Wakhtigaaga dhawr oo
Ha ku dhuminnin meel baas
Waxba aan ka dhalanay

Dhulkaagiyo wixii yaal
Inaad cadow u dhiibtood
Ka dhaqaaqdo waxay tahay
Meeshaad u dhiman oo

Dhabarkaaga jabin oo
Laftu dhuuxa ay qubi
Dhiigguna istaagayn
Dullinimo dhadhamadeed
Waxaa dhaanta geerida
Iyo dhimasho sharaf badan

Dhib-yaraan ha kaga tagin
Ha is dhiibin waligaa
Dhiirranaantu waa kayn
Aan kaa dhammaanayn
Wixii hadhay dhaqaalee
Rejadaadu yay dhumin

Qaybta Toddobaad - dhul la'aan ma noolaan?

Dhallin aragtidooduba
Aanay dhaafsanayn hadal
Shaqo dhumuc le qaban karin
Meel dheer wax ka arkayn
Nacab dabinnaduu dhigay
Dhoohanaan daraaddeed
Aan ka dhowrsan karin abid
Dhib-yaraanna dalaq dhihi
Cadawguna ku dhaantayn
Farxad uu la kala dhici
Sideen u la dhaqmaayaa?

Markaad dhugato nacabkiyo
Wuxuu dhagar maleegiyo
Wuxuu dhamac shidaayoo
Dhan-walbaba ka soo hurin
Dareen dhaba ma waydeen

Dhulku halis inuu galay
Dhibta aniga igu dhici
Yay dhimashadii tahay?

Dhulkiinnii haddaan ahay
Inaan dhaxal wareegaan
Dhab u qaatay aniguye
Dhul la'aan ma noolaan
Dhaawaca xanuunkiyo
Dhibta aniga igu dhici
Dhiirranaanta nacabkiyo
Mu'aamarada uu dhigi
Yay dhimashadii tahay?
Ciidankaa is dhaafee
Dhan walbaba ka soo dagay
Dhulkiinnii ma aragtaan?

Baddan dhumucda weynee
Dhammaan cadow is biirsada
Maraakiib ka dhaansaday
Ma ogtahay dhibtay tahay?

Dhulkoo idili waa gogol
Taariikhdu siday dhigi
Dhaxal kooxna u ma helin
Kuwa dhididka saydhoo
Hantidooda dhiiboo
Dhiig kulul u daadshoo
Waxba aanan dib u dhigan
Yaa dhaxal u heli kara
Dhallaankooda kayd u ah
Dhib yaraan ku maamuli
Haddaan anigu kaa dhumo

Colku gacanta igu dhigo
Dhanka cadowga aan maro
Dhayalsiga ka daayoo
Dhab u arag su'aashane
Dhallinyaro maxaad fali
Dhul la'aan ma jiri kari?
Waxaan rabay inaan dhaho
Dhankaygii ka soo gudub
Isma lihi waxbaa dhimman
Dhaliil aan ku mudan karo
Ood igu dhalleecayn
Dhawaaq igu ma harin ani
Dhallintaan jeclaayeey
Go'aan dhiirran qaatoo
Fuliyoo dib ha u dhigin
Fursad dheer ma laabnee
Yuu sabanku kaa dhumin

Dhallin tabar la'aan dili
Isxilqaanku dhinac maray
Talo waa dhankaagee
Dhaqangalin go'aankiyo
Wixii dhaca i maqashii
Dhagtu heegan weeyoo
Waan kaa dhursugayaa.

# 52. Dhabbe Toosan

Waxaa igu dhaliyay tixdan markaan arkay aqoonyahan Soomaaliyeed oo waxyaabo aan is lahayn oo la isku kabkabo dhaqankii fiicnaa, diintiisii, dalkiisi uu barbar dhigayo waxyaalo kale oo aad uga durugsan. Waxay u muuqdeen inay rabaan wax walba in si degdeg ah loo beddelo. Waxay halmaameen in bulsho waliba soo martay maraaxil aad u dheer oo samaysay siday maanta tahay, taa oo aan u arkay in ay tahay dhalanteed iyo wax aan is qaban karin. Sababtaa ayaa igu dhalisay maansadaan:

Dhagax iyo labay kala yihiindheemman dahabkiiye
Dhabta iyo labay kala yihiin
male ma-dhaafane
Dhunkaashiyo labay kala yihiin
dhayda xooluhuye
Dhukaan iyo labay kala yihiin
geel dhammaystirane
Dhabbe iyo labay kal yihiin
kayn dhalaal badane

Kala dheer cilmiga kii dhunbaday
iyo dhegnuugaale
Dhulka oo cagaarkiisu baxay
quruxna loo dhiibay
Ha is dhihin abbaarkay dhibtuu
dhalan ku gaaraaye
Dhabba toosan waa kuu Ilaah
noo dhiluu faraye
Oo lagu dhammaystiray Waxyiga
dhawran oo idile

Dhabtii oo qayaxan buu la yimid
dhalad Rasuulkiiye
Dheelliyo dhimaal iyo waxyigu
ma leh dhantaalnaane
Dhan walbood ka eegtaa ma laha
dhaawac iyo ceebe
Dhambaal weeye soo diray Alloo
noo dhamaystiran e

Markii lagu dhaqmay diintu noqon
dhayda maanyada e
Oy dhaqi balaayadan dhulkii
dubatay dhuuxiise
Ummadaha dhulkoodi dhisee
diiday dhicisowga
Dhiba weyn bay mareen maalmo badan
dhiigna loo qubaye

Shaqo dhab ah ayay kaa rabtaa
inaad ku dhiibtaaye
Dhanka hawshu ay kaa jirtay
dhibi ka joogtaaye
Waxaa laysku dhaafaa waxqabad
aan dhaliil qabine
Dhulka kale waxaad ku aragtiyo
dhaqammo raad weyn leh
Ha is dhihin dhulkaaguu wax tari
wadar dhammaantiise

Dhalanteed ma fiicnee runtaa
lagu dhaqaa qarane
Cid waliba wixii ay dhistay
dhab ugu faantaaye

Aqoonyahan dhaliishaada badan
hawlla dhinac oollin
Waa dhaqan qalloocdoon marnaba
qiime dhalinayne.

# 53. Caqli Dhab ah Allow na Sii!

Gabaygani wuxuu ka dhashay booqasho aan ku tegay xeryaha qaxootiga ee ku yaalla dhadhaab oo ka tirsan waqooyi bari Keyna. Waxaan ahayn gurmad ay hoggaaminaysay Jaamacadda Mugadisho, si loogu gargaaro kumannaan ka mid ah dadkeenna oo abaaro ay haleeleen 2011. Waa markii ay ku habsatay gobollada koonfureed ee Soomaaliya abaartii qallafsanayd ee ka dhalatay colaadaha ka oogan, hoggaan-xumo joogto noqotay, iyo burburka taagan. Markaan arkay boqollaal kun oo ilgeeriyaad leh oo daadsan gudaha dalkeenna iyo dibaddiisaba ayay igu soo dhacday maansadan:

Caqli dhaba Ilaahow na sii
caaddil baa tahaye
Carrigaan ku noolnahay ka yeel
cimilo khayraad lehIyo goob cibaadoo samaan
laysku wada caawin
Oo ceebahaa sharafta dilay
Aan ka wada caagno

Colaaduhu wixii ay dunsheen
Ciilna nagu reebay
Amaan cududo weyn iyo
Dadnimo laysku wada caawin
Oo calanka iyo dawladnimo
Ceebta laga mayro
Allow caafi boogaha ciyoow
Caaddil baa tahye

Awoodaha cilmiga ee runtaa
Caaqibiyo aayo
Ciyaar ku ma timaddee dadaal

Culus ayaa keenay
Carruurtuna ku toosaan jidkaa
Ceebta laga mayray
Allow nabaddii soo celi calankii noo yaallay
Cilmigii Quraankiyo wuxuu
Nebi carfoon sheegay
Cashiradda sharcigu noo dhigaa
Calaf wanaag keeni
Cirrooliyo dadkoo idil ha maro
Hilinka caabboone
Caasinnimo dhibteed aragnay iyo
Mahadho ceebteede
Allow nabaddi soo celi tagtiyo
Calanki noo yaallay
Cadli madax leh Eebbow na sii
Iyo cuddoonaanba
Oo calanku muuquu lahaa
Maalin soo celiya
Dilka iyo colaadaha jiriyo
Cudurka daaweeya
Barwaaqiyo caddaaladda hadhkeed
Nagu cashaysiiya
Cafis iyo walaalnimadu ay
Gobalka caan yeesho
Shaqo culusna aan wada galnoon
Cidina meel jiifin
Caqli run ah sidaasuu ku iman
Ceebna laga maydhan
Cibaadiyo markaasay sax noqon
Camalka Diinteennu.

# 54. Isagoon Birtiis Tuman

Ninkii buun afuufoo
Baaq colaad ah kala diray
Isagoon birtiis tuman
Billaawahana soofayn
Ciiddaan baaxad weyn hanan
Bahdiisana ogaysiin
Berri inuu dagaal dhici
Iyo baahii waxa dhalan

Waa doqontu baabkay
Ku baabi'in dadkeedoo
U bidhaamin nacabkoo
Siruhuu u baahnaa
Baadigoobna ugu jiray
Sida loo burburin duul
Beryo hore adkaan jiray

Waa baabka doqontee
U ballaqi ninkii dili
Badanaa albaabbaha
Iyo baahiduu qabo
Billaawana u soofayn
Boqnihiisa lagu jari
Waa dhaqan baraad li'i
Ku burburin wixii jiray
Iyo boholo laga qodi
Bartii laamida ahayd
Baabuurku mari jiray

Ha ku dagannin buuq aan
Xikmad lagu baxnaanshiyo

Caqli lagu barbaarshiyo
Talo buuxda lagu dayin
Barbarrada aan loo rogin
Baahideed si loo kabo

Waa howl bilow u ah
Inuu cadow ku baacsado
Seedaha boqnaha jaro
Kaa burburin lafaha oo
Rejo beelna kaa dhigi

# 55. Dadku Ha isla Joogo

Midnimadu dadaal bay ku timid
Doonid iyo xiiso
Waa howl is daba taalla oo
Diintu waajibine
Danta guud dadaal loo dhanyahay
Khayr is daba yaalla
Dariiqeedu waa kaa mid kale
Loo ma daydayo e

Waa daacadnimaduu la yimid
Duulka toosaniyee
Dareennimo waddaniyay dhisaan
Ka mana daalaane
Maslaxadda dalkooday wadaan
Waana loo diraye
Deegaanka nolashiisa iyo
Dib u haybntiisa
Yuu yahay waxay doonayaan
Ama waxay diidi

Xoog la isku daray buu ka yimid
Dooggan soo bixiyay
Waa beer dadkeedii faloo
Ubaxa soo daysay
Kii raba inuu dumiyo sow
Daa'im qaban maayo?

Dulli iyo darxumo yuu la tagi
Iyo dareen hooge
Nin la diriray khayrkiyo dacwada
Doogsi heli maayo

Dadka kala kaxayntiis haddaad
Darajo moodaysid
Dariiqii xumaa baad martiyo
Dib u shallayntiise
Dabinnada iblays uu dhigaad
Doorataye qaado

Midkee bay dantiis tahay inuu
Dumiyo hoygiisa?
Dugsigiyo gabbaadkaad lahayd
Maalintaad dumisid
Dabaylaha dhacaayiyo hanfigu
Soo ku dili maayo?

Dadku ha isla joogee maa
Buuqan laga daayo
Iyagaa is doortoo jacayl
Darajadii qaatay
Intii duni is kaalmaysataa
Dawladnimo gaartay
Maxaa doodda shayddaan bulshada
Loogu kala daadin?

# 56. War Ma Kala Dan Baan Nahay?

In aad doonto raaxiyo
Wax ku deeqa keligaa
Adigoon daryeelayn
Duruufaha dhibaatee
Dadka kale ku noolyahay
Dib u dhowr waxay dhali
Adigoon is diidsiin
Runtana aadan daba marin!

Waxaad dooratoo idil
Waa lamadagaan iyo
Dayr wehel la'aanoo
Cabsi iyo darxumo badan
Dabayshoodu ku la tegi
Dabin cadow u dheer yahay
Nafci ka ma dambeeyee
Ha isku dayin inaad tahay
Mid danaysta keligii

Dantaadiyo dantaydiyo
Inta kale dantoodaa
Isku daaban abidkood
Oo dawlad calankeed
Dammaashaadka loo dhigay
Dalku nabadna soo maray

Hadday kala durkaan saban
Danahaan wadaagnaa
Way wada dumaayaan
Dadaal culus la'aantii
Dibna loo ma kabi karo

Waa daliil-maddoontee
Dib u eeg wixii dhacay
Markii danaha guud iyo
Dadku waxay wadaageen
Dadaal weynna loo galay
Isku duubni lagu helay
Qaar duluc u leexsaday
Meel daran la aadeen

Maxaa dhiig la daadshoo
Bir-magaydo la dooxoo
Danaystuhu dabkuu shiday
Danbaskiisu noolyahay
Wali daaro gubayaa
Dadku kala qaxaayayaan
Durbaankiyo colaadaha
Danankoodu baxayaa
Oo loo dabbaaldegi!
Dadweynahaan su’aaliye
Kuma yay dantii tahay?

# 57. Dhalashadii Nebiga (Nnk)

Daqiiqaddii la dhalay buu
Dadkoo idil ku diirsaday
Daa'imkeen ikraamoo
Waa maalin daraja leh
Duniduna iftiin tahay
Oo nuurku daa'imay

Dadkoo wada wareeroo
Dariiqii ka leexdoo
Daruuraha sidoodaa
Dulmiguna is wada koray
Yaa Nabiga loo diray
Ummad aan dulqaad iyo
Daris iyo ammaan qabin

Oo kooda daayacan
Marna aan danaynayn
Ama aan daryeelayn
Xumahana aan diiday
Sharaftana aan doonayn
Dareen nabad la'aaniyo
Duunyadoo la boobiyo
Dilku joogto uu yahay
Dadku ay is wada layn
Sidii bahal dugaagoo
Hilib dooni uu cuno
Raxmadduu la soo dagay
Diintiyo jidkiisii
Khalqigaa ku doogsaday
Intii diiday mooyee
Dulligiina kaga baxay

Muddo gaaban dabadeed
Caalamkay daryeeleen
Waa laga dambayn jiray
Dib u dhis bay sameeyeen
Caddaaladu ku daabnayd
Cilmi durugsan lagu hagi

Markaan diidnay amarkiyo
Waajibkii la noo diray
Iftiinkii la diidoo
Darbi madaxa la la dhacay
Yaan dakharradaas iyo
Dulli aan ka dharagnee
Dib u eega saan nahay

Owr dacayda dhibtoo
Sanka laga duleelshoo
Dadka kale rartaan nahay
Duruusteeda i la arag!

# 58. Waa Wacad Ilaahay

Tixdani waxay ku timid munaasabaddii aan wareejinaayay madaxtinnimada Jaamacadda Muqdisho (2016).

Qayb ayay ka ahayd hadalkaan meeshaa ka jeediyay.

Dadaal la isla wado oo
Dadku aay waldaafshaan
Maal weynna lagu daray
Hoggaankuna wax-garad yahay
Musuqmaasuq aan wadan
Madaxduna walwaalaan
Wanaaggeeda oo idil
Waddankana ku fidiyaan
Khayaanana warkeed jirin
Waxbarashaa mudnaan u leh

Wadiiqaha habboon ee
Waddo toosan nagu ridi
Waligeed qalloocsamin
Waddankana hormarin kara
Walaacana ka bixin kara
Haddii waafi loo wado
Manhajkuna war saxan yahay
Waxbarashaa albaab u ah

Intii aan wadku i helin
Caqliguna waxgarad yahay
Waddankiyo dadkaygaba
Wax kastoon u qaban karo
Waa wacad IlaahayInaan wado intaan jiro

Waxaan kaashan doonaa
Walaalahan horjoogiyo
Inta weedhan maqashiyo
Soomaali wadarteed

# 59. Yaa Baajin Kara Xumo?

Yaa baajin kara xumo
Balaayada tirtiri kara
Yaa beeri kara nabad
Ubadkeenna bari kara
Inay doodda badiyaan
Gacanhadal ka baadaan
Cilmigana ku baaqaan
La beddelo af xumadaan
Beri hore aan dhaxalluu
Ku burburay dadkeennii
Ku baaba'ay dalkeennii
Beesha dunida daba maray

# 60. Da'da Soo Koraysa

Da'da soo koreysee
Dadaal sharaf le bixinee
Daaddihin cilmiga sare
Durdurkiisa ka cabbaan
Anigu door bidaayaa
Dadka inay habeeyaan
Dariskana nabdeeyaan
Dalkana ay hoggaanshaan
Dulli xididdo yeeshiyo
Dulmigana ka saaraan

Dareenkii waddanigee
Dadkii hore xabaaleen
Dib ka soo abuuraan

Da'da soo koraysaay
Aad dunida raacdide
Dadaalkaaga kor u qaad
Danta guudna ku adkow

# 61. Warxumada Guryaha Taal!

Waalidkii carruur dhalay
Waddo toosan aan marin
Wanaag iyo samaan barin
Wasakh abid la socon iyo
Wareer iyo xumaan dhaxal

Waalid aan samaan fidin
Ku wardiyi xumaanshaha
Waa dabin musiiba ah
Waa mahadho joogta ah
Waa mowd aan laga kicin

Warxumada guryaha taal!
Waaliddiintu ma ogtahay
Mise waa warmaoog aan
Waajibkooda garanayn
Waxa dhacaya qayb ka ah
Oon korin wanaaggaba?

# 62. Gurmad

2011 ayaa Jaamacadda Mugadisho ku baaqday gurmad degdeg ah iyo in gacan loo fidiyo walaalaheen abaartu dumisay noloshooda, gaar ahaan gobollada koonfureed ee Soomaaliya. Munaasabaddan ayaan ka hadlay oo aan ku sheegay, “Waxaan hubaa in ruux waliba uu quudin karo mid ka mid ah dadkan dhimanaya oo markuu ugu yar yahay uu dadka kale wax ka soo ururin karo, hadduusan jeebka wax ku haynnin, ama uu soo ducayn karo. Mahad ayaan idiin jeedinayaa daryeelkiinna wanaagsan, arrintuse way ka weyn tahay dareen qudh ah.”

Geerarkaan maalintaa ayuu igu soo duxay:

Daa’imow gargaar sii
Dadkaygaa dulloobee
Cidna aan danaynayn
Darxumiyo dhibaatada
Daleedaha la jiifoo
Hilibkood dugaag cuni
Ayagoo dareen qaba
Naftu aysan wali dayn

Gurmad dowlad ka ma hello
Damqasho iyo xannuunkeed
Dad weynaa awood badan
Ayaguna dadaal iyo
Deeq la imaan wali
Tani waa daruuf adag
Dadku halis ku wada jiro
Deeqdaa Allow keen
Daawo taas ayaa noqon
Dabcin maanta waxa yaal.

# 63. Doodey Maxaa Tahay?

Qiimaha in la doodo ayaa bulshadeenna aad ugu yar. Waalid in uu baro carruurtiisa inay la doodaan ma jirto, dhaqanka madaxda dowladduna kaba sii daran. Waa habka kalitalisnimadu ku soo dhuumato ama abuura.

Maansadani waxay ka shanqarin dood la'aan xumaanteeda, dhibteeda, inta foolxumo ka abuurmi iyo meesha dhaqankaasi uu gaarsiin karo nolasheenna guud ahaan:

Dayuuradaha duulee
Dusha sare maraaye
Digtatoor ma keenine
Dadaal laysku geeyiyo
Dood lagu salayn baa
Dariiqeeda lagu helay

Dareenkoo midooba
Dagaal lagu adkaadiyo
Dowladnimada lagu helay

Dumar iyo rag doodaa
Dayr guri la taagiyo
Danta guurka lagu hellay

Duul faham wadaagoo
Dooddoodu furantahay
Dadaal iyo aqoon iyo
Cilmi dihin adeegsaday
Ayaa qalabka duuliyo
Dayax iyo bil lagu tago
Tashi iyo diraasiyo
Dood la isku geeyo

Caqli lagu daruura
Diin saxoo la raaciyo
Dambidhaafka lagu helay

Dadaal dhaxalgal oo runa
Dad badani ka qayb galo
Danta guud ka talin kara
Darxumada ka bi'in kara
Daawana u noqon kara
Dood baa albaab u ah

Danbiyada isbuurtee
Dalkeennii burburay
U horseeday daayaca
Iyo mahadho daa'im ah
Dariiq lagaga bixin karo
Dood baa albaab u ah

Madax xukunka doontoo
Dadka ay u taliyaan
Tashi aan ka doonayn
Dantooda aanan wayddiin
Maslaxa guud daryeelayn
Dadweynaha xaqiis cuni
Dulmi foolxun weeyoo
In la diido wadarteed
Dadka oo tashada iyo
Dood baa albaab u ah

Inaan daminno dhaqan xumo
Dhaawacay dalkeennii
Oon diidno kalitalis
Innagoon dagaal hurin

Dadna xaabo uga dhigin
Wixii harayna duminayn
Ku dadaali nabaddiyo
Distoorkoo la raacoo
Daaddihiya howshaas
Dood baa albaab u ah

Dad xun baa hoggaanshoo
Dawgii ka leexshoo
Duudsiiyay dadkii hore
Dadaalkay sameeyeen
Iyo dawladnimadii
Lagu dhisay dareen mid ah
Dadaal waxay ku bixiyeen
Inaan doodo sii socon
Hadalna uu dambiba yahay
Xabsi daa'im noqon kara
Ama laysku dili karo
Dariiq soo qalloocdaa
Xornimaddeenna duugoo
Uba diiday noloshee
Ina baday darxumadaa
Cidna aan dafiri karin
Da'yarteenna joogtaay
Dariiqaa ha qaadina
Doontaa ha raacina!

Da'yartiinna joogtaay
Dalka ani ayaa lehe
Waxaan dooni oo idil
Gacmo diirran igu sii
Waxaan diido oo idil
Ha la daayo oo naca
Anigaa dantiin garan

Diktatoor ayaa yiri

Dabci eexda beeriyo
Dulmi iyo waxboobkaas
Dadka fulin ammaan mudan
Da'yartaay ha yeelina
Digtatoorka kugu yiri
Waxaan doono i la fuli
Waxaan diido ila naca
Dad buu soo addoonsaday
Kumannaan ayuu dilay
Daarahoodii soo dhacay
Dulmi uusan wali galin
Dadkeennuba ma ay maqal
Da'yartaay ha yeelina
Darxumiyo dhibtuu wado

Duulkaan la noolyahay
Dareenkoodii wuu lumay
Dadku intay gadoodeen
"Kaa diidnay" ka ma maqal
Dunidaba dhammaanteen
Dunqaar buu u haystaa
Diiddiyo lahayn ficil
Da'yartiinna joogtaay
Dadaaloo is dhaarsada
Doodaha dhexdiinna ah
Ayaa daawo noqonoo
Dadkiinnana anficiyoo
Dalkiinnana xoraynoo
Dulli jira ka baabbi'in
Kuwa duminna qaban oo
Xabsi doodda ugu dhigi
Dibna nolosha ugu celin.

# 64. Ababinta Qumman

Waxaa abuuray jiiftadan markaan hoos u dhuuxay taya-xumada kobcinta ababinta iyo korriinshaha ubadka, taasoo keentay in ay ina ka dhaxlaan inta aan jirro qabno oo wax tallaal ah haba yaraadee aan la siin:

Ninkii beer abuuraa
Awood iyo dadaal badan
Ayuu soo uruurshaa
Abuurkeeda geliyaa
Alaalada adkeeyaa
Allabarina raacshaa
Anfac miro ka goostaa
Albaab kale miyaa furan
llmahaan dhaleynnaa
Wuxuu noqon ilays iyo
Iftiin aan qarsoomayn
Haddii lagu agaasimo
Aqoon iyo wax garashiyo
Edeb dhaxalgaloo sugan
Ubadkeenna sharafta le
Haddii lagu agaasimo
Aqoon iyo wax garashiyo
Anshax iyo asluub saxa
Ebyoon oo dhammaystiran
Markaasay awood heli
Iyo kobac idaylkiis
Ayagoo itaallay
U adeegi beladkoo
Aabbo iyo hooyana
Abaalmarinta ay heli
Ixsaankooda joogtayn

Ilmihii hannaankaas
adag lagu barbaarshaa
Aflax bay ahaanoo
Abidkood ma hoogaan
Sharta u ma arooraan
Ilmihii iftiin iyo
Aqoon lagu korshaa baa
Albaabbada wanaagga ah
Ilaahay u wada furi
Ijaabadiyo khayr bay
Ku abaabi noloshoo
Aqbal Eebbe yay heli
Ubadkii iftiin iyo
Asluub iyo hannaan saxan
Aqoon lagu barbaarshaa
Akhlaaq loo bogaa iyo
Waxay yeelan edeb oo
Anbaqaadka noloshana
Aayadaha Quraankiyo
Axaadiista Nebiguu
Aadanaha ku socon oo
Iftiin haga ka dhigan oo
Asxaabtii Rasuulkuu
Adab iyo dabeecasda
U ekaan ku dayashoo

Kuwaasaa aflaxayoo
Noqon ubad hagaagoo
Eebbaa hannuunshoo
Ebedkood ma hoogaan
Sharta ku ma arooraan

Ummadyahay dhammaantiin

Indhahiinna wada fura
Awooddiinna oo idil
Ubadkiinna saaroo
Tarbiyadda adkeeyoo
U halgama carruurtoo
Ubaxeennu yuu dhadhin
Oon oonku naga gubin
Abuurkii xumaadaa
Ummaddeen dhib ugu filan
Aafadiisu way fidi
Aqal ku ma ekaatee
Arligoo dhan bay gubi
Ilmo waayay edab saxan
Cilmigiyo awooddiis
Adduunyada ma raacee
Sharta yuu abaabuli
Abidkiis dab buu hurin
Aqalkuu ka yimid iyo
Ummaddiisa lagu gubo
Aabbo iyo hooyiyo
Inta ubadka korisaay
Ka adkaada hawshiin.

# 65. Yaa Ceebta Naga Dhaqi?

Dhammaan doodaha aan maqleynno waxay u bateen in la is eedeeyo oo ruuxii hadlaayaa uu is beri yeello dadka kalena eed dusha ka saaro, taasoo keentay masuuliyad la'aan guud. Tixdani jawigaas ayea ku dhalatay, oo waxay ka tarjami hoggaan xumada aan dhex jiifno maanta iyo in aaynnaan garaysan fashilka, ama garasho xumo hadhaysay qaybo badan oo dhaqankeenna ah:

Casrigaan ku noolnahay
Calaamkaa isbiirsaday
Cududdiisu kobocdee
Caqligoodu tabargalay
Iyo caawa saan ahay
Ayaa ciil i baday oo
Cillad iyo dhib igu rida

Anoon cudur xanuun liyo
Cabsi gaar ah aan qabin
Yay calawday taladay
Oon ka caagay raaxada

Culays iyo dhib daa'ima
Iyo cagajuglayn iyo
Ciidan duullimaadaa
Carligeenna halis ku ah
ku ciyaari shacabkaa
Caddaan iigu muuqdee
Sidee baan u celinnaa?

Cuqaal iyo waxgarad iyo
Culumiyo in sharaf badan

Ayaan caawa tebeyoon
Cudud iyo awood bidi
Caawimaad ka sugayaa

Su'aal aan cabbudhiyoon
Saban dheer celcelin jiray

Colaad iyo dhibteediyo
Cartan iyo dagaal iyo
Diin lagu ciyaariyo
Caqligoo la garab maro
Cidhibtoodi aragnaye
Cid walba la kaashoo
Ii sheega ceebiyo
Wixii curin colaadaha
Carruur iyo cirroolaba
Dulligay cabbeenoo
Cimrigooda dumiyoo
Cidna weli ka daawayn
Wixii curiyay ii sheeg
Calankiinna duugoow
Cidna ceebta ka ma bi'in
Cudurana u ma fidin
Wixii ciilka noo qabay
Calankeenna ii sheeg
Abbaaraha dadkii cunay
Cudurradaan is daba yaal
Cidna ay ka nabadgalin
Culays iyo dhibteedii
Kuwa caawin ii sheeg!

Culumadda wacdiga fidin
Diintana ku caan baxay

Hanuun cidina ka ma helin
Cilladaasi waa maxay?

Aqoonyahanka caanka ah
Cilmigoodu tabar galay
Caalamkuna aqoonsaday
Dalka ceebta ka ma korin
Cidna caymo ka ma helin
Cilladaasi waa maxay?

Cirrooliyo duqaydii
Caaqil lagu yaaqaannoo
Cisi lagu ogaan jira
Calankooda lulan jiray
Markii aynnu laga rabay
Ceeb bay dabaasheen
Cidna u ma talshaanoo
Iyagaaba ceebtiyo
Carbiyeen balaayada
Wax ka ceyntay yaa yare
Caqli toosan laga waa
Cilladdaasi waa maxay?

Dhallin wada cuddoon oo
Muruqyada culayskiyo
Caafimaadku taam yahay
Cunta ay abuuraan

Cudur iyo dhib daawayn
Iyaguna cunaayaan
Carligeenna laga waa
Ceebahan burqanaaye
Cimiladu ka nabad geli

Baahi iyo coolaad iyo
ciilkiyo dhibtaan qabo
Cadawgaygu
igu digan
Cid walbay danteed tahay
Hilibkayga cuni kari
Oo cilladdayda daawani
Qosolkayga celin ebed
Waxba yaaney ciil iyo
Cakudiyo catowdoo
Sidii aar caraatami
Ciidayahay ku fadhi dhagax
Caalwaana noqoniye carruur iyo
Dadweyn dulligaan cammimay
Oo cagsaar calaajiyay
Inaan caal u jirinnaa
Ceebnaha dabeeyoo
Cudur iyo colaaddana

Carligeenna laga dhaqo
Waa camal dhammaanteen
Cid kastaba kuwaajibay
Lagu mudan ciqaab weyn
Haddaan caadi loo gudan
Oon caddaalo lagu wadin.

# 66. Daniba Way I Ciidsiin!

Sanadii 2011 waxay Ciidda Soonfureed ku soo toosay abaarihii oo weli ku rafanaya dadkeenna. Waxaan soo xusuustay inay jiraan boqollaal kun oo ruux oo aan maanta heli karin dhar ay xirtaan ama cunto ay ku cunaan guryo hanti u ah. Maxaa yeelay, waxay daadsan yihiin jidadka iyo darbiyada guryaha dadka kale. Iyaga ayaan cabbirayey dareenkooda xanuunka leh. Facebooka ayaan in ka mid ah tixdan geliyey:

Dadka baahan baa yiri
Dadka aan la noolahay
Dareenkayga ma qaddarin
Daayacaan ku suganahay
Hoos cidi u may dayin

Digdigtiyo rabbaaskiyo
Damaadshana ku ma jiro
Ma diidaayo sabankee
Anigoon diyaar noqon
Dantuba way i ciidsiin!

Dulmiyadan is daba yaal
Dulli aan dhammaanayn
Oo dabinno nagu riday
Ayaa dilay dareenkii
Dabku uu lahaan jiray

Maskaxdaa la daashoo
La dakaamay xooggii
Damaashaadka ciidaha
Ma danaynnin sabanadan
Durbaankeeda u ma tumin

Dirays quruxsan u ma xiran
Dadweynow ma ciid baa?

Inay ciiddu deeq tahay
Daa'im nagu mannaystoo
Oo Soonka dabadiis
Dammaashaad imaan karo
Dadku wuu ogsoon yahay

Ha yeeshee dalkeennii
Duruufaa ku yimidoo
Nolosheenni dumiyoo
Dadkeennii in badan baa
Darxumiyo rafaad culus
Dariiqyaha la jiifoo
Aan danaynnin ciiddaba
Dareenkeedu maqan yahay
Dantii bow run-sheegtoo
Ma deeqsiiyo hadalkee
Dadka wuxuu ku leeyahay
Damaashaadkan xoogga leh
Durbaankiyo sawaxankiyo
Waxa uun is daba didi
Dadku wada qoslaayaan
Ma deeqdaan sugaayoo
Dadkaygii sidaan baa?

Mise waa dan kale oo
Dareenkayga dhaawici
Oo dili rejada oo
Deeqdiina quus galin
Anigana i daayici?

# 67. Dadku Kala Ayaan Roon

Sanadkii 1991 ayaa arday Jaamacadda Malik Sucuud oon macallin ka ahaa xaflad u qabatay isbeddelka ka dhacay Soomaaliya. Ka ma aan qaybgalin cuntadii iyo cabbitaankii. Ciid ii ma ahayn maalintaasi, waxaanse ka hadlay oo cabbiray sidii wax iigu muuqdeen.Soomaaliya ayaa duntay ee xukun isma baddelin ayaan iri.

Toban sano ugu yaraan ayaan u qabtay in ay soconayaan dagaallada sokeeye iyo burburka dowladdii Soomaaliya. Bil-iliqadii USC ay u gaysatay rugta Mataxtooyada ayaa ii ahayd astaan tilmaan u ah meesha loo socdo. Haseyeeshee, 15 sano ka dib, 2006, ayaa waxaa ka dhacay magaalada Muqdisho iyo meelo kale dagaallo aan kalago' lahayn. Markaas ayaan is wayddiiyay meeshay wax u socdaan. Dareenkaas ayaa curi-yay mansadaan:

Dadku kala ayaan roon
Dib haddaan u eegnaba
Diiraddu waxay qaban
Dilka iyo dhibaatadu
Dadka way mideeyaan
Duruufaha la soo maray
Dulligay abuureen
Darsi bay u wada tahay
Dibna loo halmaamayn.

Daris adaan rari karin
Dantaadiyo dantiisuna
Daaraha dhexdoodiyo
Daa'im meeshan ay tahay
Dagaal iyo dhib aan hadhin
Dulmi iyo qas joogta ah

Daawo maysan weli noqon
Dadku ku ma heshiin karo.

Dariiq kale ma goobnaa
Dadaal wacan ma dhiibnaa
Oo daacad laga yahay
Daw saxan ma qaadnaa
Dibna looga noqon karin
Dilka ma iska daynnaa
Danteennaa sidaa ahe?
Dadku kala ayaan roon
Dib haddaan u eegnaba
Diiraddu waxay qaban
Dunidaa tartami iyo
Dalalkaa is wada cunay
Dumin iyo qax soo maray
Dadku waxay samaysteen
Dadaal weyn ku bixiyeen
Dab intay ku huriyeen
Dulmareen wixii jiray
Duul waliba duul buu
Dadkii ugu dhowaa iyo
Dariskiisi wada gubay
Uu dumiyay noloshood

Dantu waa balaayee
Dood bay bilaabeen
Dibna way iska waansheen
Dadaal bay sameeyeen
Dadku waxay garaysteen
Dagaal inuusan khayr dhalin
Dibna loo heshiin karo
Markaasay daneeyeen

Deegaan nabdoon iyo
Dadka oo iskaashada
Dulmi xadhiga loo jaro
Noloshana dib loo saxo.

*Qaybta labaad: dacar malab ka timid!*

Dadkaygow macaanow
Dacar malab ka timidow
Isagoon dan kale hayn
Dariiq saxa ka leexdow
Isagoo duruuf qaba
Daawo iyo fayoobiyo
Caafimaadka diidow!

Dadnimadu siday tahay
Dulli kii ka doortow
Danta guud xumeeyow
Dagaal aan istaagayn
Dulucdiisa la aqoon
Dariskiis ku huriyow!
Dadki uu la soo koray
Ama diinka bari jiray
Hilibkooda daaqow
Kii dumiyay ceelkii
Dadku wada cabaayeen
Isagiina oon dilay!

Dantiisiyo wanaaggaba
Dariiqeed ka leexdow
Darxumada ku toosow
Dareenlaawe dhumayow
Dulmi xera ka yeeshow

Dariiq toosan oo falan
Dalku aammin uu yahay
Halis dili abuurow!

Maxa dilay dareenkii
Dadku uu lahaan jiray
Dariiq toosan lagu nacay?

Maxaa liqay dadnimadii
Dalka lagu aqoon jiray
Dariskuna u marag kacay?

Maxaa diiday marinkii
Dadku wada jeclaysteen
Duniduna ay haa tiri
Diintuna ay qeexdoo
Daliilkeedu marag yahay
Oon dood aqbali karin?

Darbi aadan mari karin
Ha ku diirin madaxee
Dib u dhuux sidaad tahay
Oo dawga aad mari
Adigoo digtoon soco.

*Qaybta labaad: kala dooro!*
Kala dooro laba aan
Dadku weli masaynoo
Midi tahay darxumo keen
Kula aadi meel daran
Kaa dumin wanaaggii
Dadku ku la jeclaayeen
Dadaal toosan lagu helo

Dariiq kalena waa kay
Dadku guul ku gaareen
Dulli kaga baxeenoo
Nabad ay ku daaqeen
Dalkoodana xasiliyeen
Dulmigana ay diideen
Dariskoodu nabad galay
Dunidana aqoonsaday

Inta dunida joogtee
Garashadu ay daaddihin
Wax kastoo dulmi ahoo
Dadkoodii ku kala tagay
Daawaduu u baahnaa
Dagaal la la ma aadine
Xigmad bay ku doonaan
Taasay dan moodeen
Dabar iyo hoggaan u ah

Maxaa diiday taladaa
Ummaduhu daneeyeen
Dantoodana ku gaadheen?

Dulli inaan ahaannaa
Dilka iyo is boobkiyo
Dabargoynta reeraha
Dariskoon is aamminin
Dadku kala qaxaayaan
Oon la beerin dalaggii
Abaartii dillaacdaba
Dadku ay dhammaadaan
Dunidana la tuugsado
Ceeb iyo darxumadaa

Sidee lagu daweeyaa
Dalka looga maydhaa?

Duruuftaan ku suganahay
Damiirkeenna way gubi
Dadkuna wuu hallaagsami
Dalkana nacab ayaa degi

Mid danaysanaayoo
Cadowguna uu daaddihin
Duniduna ay hiil siin
Yaa dawladdana hagi

Dantu waa mid kaliyee
Sidee baan ku doonnaa
Dadka loo mideeyaa
Daawladeedda loo heli?

Dalku inuu hagaagoo
Wax khaldamay dib loo saxo
Dadkoo meel u jeediyo
Dadaal wada jiraa qaban
Oo doorta madax aan
Dalka been ku maamulin
Eexdana ka daahiran
Danta guudna u halgama
Oo diinta raacoon
Distoorkana khilaafayn

Dareenkii waxbarashada
Calankeeda daadihin
Oo garan darxumadiyo
Dulligiyo dhibaatada

Dalka saaqday badankiis
Inuu yahay jahliga dagay
Dayrkii guryaha iyo
Dugsiyada dhexdoodoo
Darsi fool xun laga bixin
Oo dumin tarbiyadoon
Marna daawo noqonayn
Iyo daris walaalayn
Dalka nabad ku soo celin.

# 68. Nin Dafiri Dadkuu Dhalay!

Waxay saartay korkeeda intaan ka qaaday ayaan iri, “xooggaaga inoo kaydi adeer!” Intay qososhay ayay tiri, “Walaalna waan noqon karnaa”

Waxaan iri, “Ma ahi kuwa diida waalidnimada oo iyaga oo ay ka muuqato da’du timaha madoobeeya ee gabar yar oo awow iyo aabbo ay u noqon karaan ”abbaayo macaan” ama ”walaal” u adeegsan markay la hadlaayaan.”

Si deggan ayay u la socotay hadalkayga, markaas ayay tiri, “Waan kaa aqbalay inaad waalid ii tahay. Ma ogtahay maalin aan dheerayn ayaan oday Soomaaliyeed anoo ixtiraamaya intaan ”adeer” ku iri cay iga la daalay! Waxaan ku iri, ”Raalli ahow walaal hadalkaa iga xumaadee. Waan dejiyay, marka ha i la yaabin haddaan cabsado.”Dhaqanka iyo diintu isku meel ayay ka joogaan arrintan. Waalidnimo waa maqaam sare oo Ilaahay siiyo dadkuu rabo. Waa sharaf in aad gaarto cimri lagugu qaddariyo oo laguu arko inaad mudantahay. Waxaa laga rabaa waalid in uu ilaaliyo qiimihiisa.

Ruuxii diida hadiyaddaa ka timid xagga Rabbigeen, wuu khasaaray, mana mudna sharaf waalidnimo. Wuxuu ka dhigan yahay ruux ku leh Ilaahiis ’maxaad cimrigan iigu deeqday?

Maxaad mar hore ii dili wayday?’ Ama ‘maxaa la iiga daba dhashay, si aanay u muuqan da’daydu.’

Waa arrin fajiciso ah. Waxaa igu soo dhacay intan:

Nin dafiri dadkuu dhalay
La dagaali ubadkiis
Markay sharaf la doonaan
Ixtiraam la daydayi
Oo diidi dowrkii
Duqu uu lahaan jiray
Dadkoo idil qaddarin jiray

Yaa daawadiis garan
Oo loo duceeyaa?

Yaa doorin kara sidaa
Duniduba u nooshahay
Da' yaraan u soo celin?

Ama duulka soo kori
Cumrigooda doorshoo
Duqey nooga dhigi kara
Dadku wada masoobaan
Oon duulba duul korin
Cuqdadduba ha daysee?

# 69. Waalli Qaybo Badanaa!

Wuxuu ahaa nin 60 sano jira ugu yaraan. Wuxuu ahaa mid xanaaq qariyay dadnimadiisii. Waxaa afkiisa ka soo baxayey hadallo cay ah oo aad u qallafsan oo ka yaabiyay intii ag joogtay! Cidina u ma jawaabayn.

Dadkii waxay ka dareereen meeshii anoon weli garan cadowga hubkaan lagu dilaayo. Meeshii intaan ka durkay ayaan mashquul iska dhigay. W

uxuu sii waday afxumadii.

Muddo aan yarayn markuu sii waday ayuu aad u daalay oo tabartii ka yaraatay, markaas ayuu si qaab daran u dhaqaaqay, isagoo ay ka muuqato murug, ildarro iyo ciil.

Hareeraha intuu dayay ayuu meel cidla ah u dhaqaaqay. Waxaan soo aaday dhibbanayaashii oo aan wayddiiyay, “Maxaad ninka ugu jawaabi waydeen oo aad isaga waabin waydeen?” Waxay iigu jawaabeen, “Waa nin ka xoroobay xishood iyo dadnimadiisii oo samayn kara dhammaan wixii ku soo dhaca, taasina waa qayb ka mid ah waallida ee miyaan is waalnaa?”

’Waad saxan tihiin’ ayuu noqday hadalkaygii. Markaasay tixdaan igu soo dhacday:

War xumow wax baad dumin
Wax kastood samaysana
Walbahaar xanuunliyo
Waswaas ku maba daayee
Waallidu maxay tahay
Waxba aadan dhowrayn
Weerarkana la joogtayn?

Wanaag iyo jacayl baan
Weligood hallaabayn

Waxna aan dhibayn abid
Wayddii dad soo jiray
Wax-aqoon u dheer tahay
Waxaad qabanna kuu sixi
Waanaday ku siiyaan
Wehel jooga kuu noqon

Warxumadu dhib bay dhali
Xumaan waarta curin kari
Wadiiqeeda kii mara
Wanaag uu sameeyuu
Dhib yaraan ku waayaa

Wadnihiisa qayb bay
Waraabaha cunsiisaa
Markuu nabadda waayuu
Ka shallayn wuxuu falay

Warxumada xanaaqa ah
Waddo dhiig-kar bay fali
Weligii bogsoonayn

Warxumada xanaaqa leh
Waajibkii Ilaah bay
Wax khilaafsan kugu toli
Wanaag aad lahayd bay
Wasakhayn dhammaantiis

Waddadaad maraysay
Wax ku dila ku aastaa
Walaalaha is jecel bay
Waxdadooda lumisaa

Wiilad adigu korisay
Warmo kuugu dhiibtaa
Waalid iyo carruur bay
Wanaaggooda kala gayn
Qoys wacan dhexdiisay
Wax qasiyo xumaan galin

Waddan nabad u joogay
Colaad weyn ka oogtaa
Wareer iyo dhib galisaa
Waaya badan dabkiis huri

Warxumow waxaad fali
Wanaag kuu ma fidiyee
Ma is waansan kari oo
Waddo kale ma daydayan
Wasakhdaada lagu dhaqo?

Haddii kale waxaad noqon
Mid wanaag ka quustoo
Weheshada xumaantoo
Wedkiisana abuuroo
Waydaarta khayrkiyo
Waajibkuu Ilaah faray
Wanaagguna dhibtiis yahay
Walaashada shartoo idil
Wasakhdiyo qaraarkana
Waligiis macaansada

Dhalanteed ma nolol baa?

Dhalanteed ku nooluhu
Dhibta soo afsaartee

Dhaawacaysa hawshiis
U ma dhabar-adaygee
Durba wuu isdhiibaa
Quusbaa ku dhalatoo
Dhammaan shaqo wuxuu waday
Dhibyaraan ayuu dhigay

Rejalaawe dhaqankiis
Maab dhaba ma raacee
Jidka wuu ka dhumayaa
Dhankuu nacabku jiray yuu
Dhalanteed ku aadaa

Dhabbe wuxuu u sallaxayaa
Dhulka iyo dadkiisuba
Dhaxal-fudul u noqon kari
Cadaawaha dhammaantiis

Colaadaha dhacaayee
Dhiigeenna daadshee
Muslinkoo dhan wada gubi
Wax walboo dhisnaa dumin
Dhanka saxan ka eegoo
Ha is dhihin dhibkaa culus
Dhanqaryo daa'imay noqon
Dhanna looga bixi karin

Taariikhdu waxay dhigi
Guulaha dhammaantood
Waxaa dhalay jab soo dhacay
Iyo geesi dhiidhiyay
Calankiisa aan dhigin
Ka gadooday dhagartiyo

Mu’aamaro wixii dhacay
Ummaddiisa lagu dhigay
Dhimashada xalaashaday

Soojireeni waa kee?
Saban badan mid soo jiray
Shaqa saxan aan soo qaban
Sadna nolol ku soo darin
Sadaqooyin jaari ah
Sahay aan dad uga dhigin
Sidee baad u aragtaan?

Saban badan mid soo jiray
Sadarrada cilmiga ee
Noloshaba salkeeda ah
La’aatiisu silic yahay
Sina hawl u soo galin
Sidee baad u aragtaan?

Saban badan mid soo jiray
Sabiyadaan la noolnahay
Akhlaaq suubban iyo sharaf
Samaan iyo wanaag barin
Farriin suna u diri abid
Sidee baad u aragtaan?

Cumri weyn mid soo jiray
Saaqidoon wanaag falin
Saban badan ma noolayn
Waxba muu samaynnine
Subax iyo habeen buu
Saacaddooda tirin jiray

"Soo jireen ayaan ahay"
Ayuu sahay ka yeeshuu
Ku sasabay naftiisoo
Sabankiisa oo idil
Shaqo aan saxnayn iyo
Saxariir ku qaataa

Waajib la isa saaraa
Dhammaanteen sugaayee
Sabanka aad ku nooshahay
Waa hadiyad sare oo
Ilaah baa ku siiyee
Sibiq yuusan kugu marin.

***** ***** ***** ***** ***** ***** *****

Hiil
Press